

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

مُقَدِّمَةٌ

الْحَمْدُ لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ الْحَيِّ الْقَيُّومِ الْمُدَبِّرِ لِكُلِّ شَيْءٍ وَبَعْدُ:

Hordhac

Mahadi Alle ayay u sugnaatay, uunka eebbahooda ahaa, kaas oo nooli taagan oo maamula ah uunka oo idil, Kadibna:

فهذا مختصر جامع لأغلب الضروريات التي لا يجوز لكل مكلف جهلها من الاعتقاد ومسائل فقهية من الطهارة إلى الحج وشيء من أحكام المعاملات على مذهب الإمام الشافعي، ثم بيان معاصي القلب والجوارح كاللسان وغيره.

Kani waa kitaab koobaya lama huraanka diinta badankooda, kuwaas oo aanay u bannaanayn qofkasta oo qaangaar ah in uu ka jaahil ahaado, waxaana ka mid ah, caqiidada, mas'alooyinka fiqhiga ah sida dahaarada iyo xajka, iyo axkaamta mucaamalaadka oo ku salaysan madhabtii Imaam Shaafici. Kadibna wuxuu caddaynayaa kitaabku dambiyada qalbiga iyo xubnaha sida carrabka iyo xubnaha kaleba.

الأصل لبعض الفقهاء الحضرميين وهو عبد الله بن حسين بن طاهر ثم ضمن زيادات كثيرة من نفائس المسائل مع حذف ما ذكره في التصوف وتغيير لبعض العبارات مما لا يؤدي إلى خلاف الموضوع.

Kitaabkan Asalkiisa waxaa lahaa fuqahadii xadramiyiinta ahaa mid ka mid ah oo la yiraahdo Cabdullaahi bin Xuseen bin Daahir, kadibna waxaa lagu deray waxyaabo dheeraad ah oo badan oo laga soo xulay masaailka qaarkood, ayada oo isla markaana laga reebay waxyaabihii uu wadaadku ka qoray tasawufka, waxaa kale oo wax laga bedelay erayada qaarkood, kuwaas oo aanan wax ka bedelayn cutubka.

وقد نذكر ما رجحه بعض من الفقهاء الشافعيين كالبلقيني لتضعيف ما في الأصل فينبغي عنايته به ليُقبل عمله أسميناه مختصر عبد الله الهرري الكافل بعلم الدين الضروري.

Waxaana laga yaabaa in aan xusno waxyaabii ay dhaheen culumadii shaaficiyada sida Bulqiini si aan u muujino jileeca ama daciifnimada naskii asliga ah, sidaa darteed waxaa gudboon in la daryeelo kitaabkan (oo laga faa'iidaysto) si uu u ahaado fal Eebbe agtiisa aqbal ka hela, waxaanna ku magacawney: Haqabtiraha Cilmiga Diinka ee Lama huraanka ah ee uu soo gaabshay Cabdullaahi al-Harari.

ضروريات الاعتقاد Lamahuraanka Caqiidada

يجب على كافة المكلفين الدخول في دين الإسلام والثبوت فيه على الدوام والتزام ما لزم عليه من الأحكام، فمما يجب علمه واعتقاده مطلقاً والنطق به في الحال إن كان كافراً وإلا ففي الصلاة الشهادتان وهما: أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمداً رسول الله ﷺ.

Dhammaan dadka qaangaarka ah waxaa ku waajib ah in ay soo galaan diinta Islaamka uguna sugnaadaan si joogto ah, iyo gudashada wixii axkaam ah ee laga rabo. Waxaana ka mid ah waxyaabaha ay waajib tahay in la ogaado oo la rumeeyo xadla'aan laguna dhawaaqo isla markiiba haddii qofku kaafir ahaa, haddii kalena salaadda dhexdeeda lagu dhaho, kuwaas oo ah: Waxaan ka markhaati kacayaa in uusan ilaah jirin Alle mooyee, waxaanna ka markhaati kacayaa in Muxammad (ﷺ) uu Rasuulkii Alle yahay.

ومعنى أشهد أن لا إله إلا الله أعلم وأعتقد بقلبي وأعترف بلساني أن لا معبود بحق إلا الله. الواحد الأحد الأول القديم الحي القيوم الدائم الخالق الرازق العالم التقدير الفعال لما يريد، ما شاء الله كان وما لم يشأ لم يكن، الذي لا حول ولا قوة إلا به الموصوف بكل كمال يليق به المتزه عن كل نقص في حقه ﴿لَيْسَ كَمِثْلِهِ شَيْءٌ وَهُوَ السَّمِيعُ الْبَصِيرُ﴾¹، فهو القديم وما سواه حادث وهو الخالق وما سواه مخلوق.

Ujeeddada "Waxaan ka markhaati kacayaa in uusan ilaah jirin Alle mooyee" waa laabta ayaan ka ogahay kana rumaysanahay, carrabkana waan ka dhahayaa in aanan mid xaq lagu caabudaahi jirin Allaha kaliga ah ee midka ah mooyaane, kaas oo ah mid, kali, billow, horreeye, noole, maamule, daaim, abuure, quudshe, caalim, qaddere, falana wixii uu doono, wixii uu doono ayaa ahaada, wixii uusan dooninna ma ahaadaan, kaas oo aanan xeelad iyo awood la lahayn la'aantiisa, kuna astaysan dhammays ku habboon oo idil, kana hufan mudankiisu xumaan oo dhan. **"Wax la mid ahna ma jiraan, waana maqle arka"**[as-shuuraa:11].

Kolka Eebbe waa horreeye, inta kalena waa dhacdo, asiguna waa abuure, inta kalena waa uun.

فكل حادث دخل في الوجود من الأعيان والأعمال من الذرة إلى العرش، ومن كل حركة للعباد وسكون والنوايا والخواطر فهو بخلق الله لم يخلقه أحد سوى الله، لا طبيعة ولا علة

¹ الشورى: الآية 11

بل دخوله في الوجود بمشيئة الله وقدرته بتقديره وعلمه الأزلي لقول الله تعالى : ﴿وَخَلَقَ كُلَّ شَيْءٍ﴾¹ أي أحدثه من العدم إلى الوجود.

Kolka dhacdo kasta oo jiritaanka soo gasha oo ka mid ah waxyaabaha iyo falalalka, dhuuracaso laga billaabo oo carshiga lagu tago, iyo dhaqaaq iyo nagaadi kasta ee addoomuhu falaan, ama wax kasta oo la niyaysto ama qalbiga ku soo dhaca waa wax eebbe uumay, cid aanan asiga ahayna ma abuurin, dabiicaduna ma abuurin, sabab kalena ma abuurin, taadaaye, soo gelitaanka uu jiritaanka soo galay Alle doonistiisa bay ku ahaatay iyo awooddiisa iyo qadderiddiisa iyo cilmigiisa horreeyay, sida uu Eebbe kor ahaayee u yiri: "**Wax walbana wuu abuuray**" [*al-Furqan*: 2]. Oo ah in uu uunka meran ka sameeyay uu jiritaanka u soo saaray.

فلا خلق بهذا المعنى لغير الله، قال الله تعالى: ﴿هل من خالق غير الله﴾²، قال النسفي: فإذا ضرب إنسان زجاجا بحجر فكسره، فالضرب والكسر والانكسار بخلق الله تعالى.

Abuuritaanka jaadkan ah eebbe cid aan ahayn uma sugnaanin, Eebbana kor ahaayee wuxuu yiri: "Ku wax abuura oo aan Eebbe ahayn ma jiro" [*al-Fadir*: 3]. Nasafi³ wuxuu yiri: Haddii qofi dhagax ku dhufto dhalo ee uu jebsho, kudhufashada iyo jabka iyo jebiddu waxay ku ahaadeen abuurista Alle kor ahaayee.

فليس للعبد إلا الكسب وأما الخلق فليس لغير الله قال الله تعالى: ﴿لها ما كسبت وعليها ما اكتسبت﴾⁴. وكلامه قديم كسائر صفاته. لأنه سبحانه مبين لجميع المخلوقات في الذات والصفات والأفعال. سبحانه وتعالى عما يقول الظالمون علوا كبيرا.

Addoonkuna kuma laha wax aanan kasbashada ahayn, abuuristuna cid aanan Alle ahayn uma sugnaan, Eebbe kor ahaayee wuxuu yiri: "Naf kasta waxay leedahay wixii ay kasbatay, waxaana lagu leeyahay waxay gaysatay" [*al-Baqarah*: 28]. Hadalka Eebbana wuu horreeyay sida astaamihiisa oo kale. Maxaa yeelay nasahnaayee, uunka oo dhan wuu ka duwanyahay nafta iyo astaamaha iyo falalkaba. Eebbana wuu ka nasahanyahay oo ka korreeyaa waxa ay leeyihiin kuwa dulmiga fala korrayn wayne.

فيتلخص من معنى ما مضى إثبات ثلاث عشرة صفة لله تعالى تكرر ذكرها في القرآن إما لفظا وإما معنى كثيرا وهي:

¹ سورة الفرقان: الآية 2

² سورة الفاطر: الآية 3

³ Nasafi: waa caalimkii muxadiska ahaa Abuu Xafs Najmuddin Cumar bin Axmad wuxuu geeryooday 537H, wuxuu ahaa Xanafi u dhashay dhulka Samarqand, wuxuuna qoray kutub badan oo ay ka midyihiin tafsiir, caqiido iyo fiqhi intaba.

⁴ سورة البقرة: الآية 2

Kolka waxaa lagu soo koobi karaa wixii aan kor ku soo xusnay in Ilaahay waynaayee saddex iyo toban astaamood (sifo) loo sugo, kuwaas oo sheegiddooda quraanka ku soo noqnoqotay in badan, lafdi ahaan ama macne ahaan waxayna yihiin:

الوجود والوحدانية والقدم أي الأزلية والبقاء وقيامه بنفسه والقدرة والإرادة والعلم والسمع والبصر والحياة والكلام المخالفة للحوادث، فلما كانت هذه الصفات ذكراها كثيرا في النصوص الشرعية قال العلماء يجب معرفتها وجوبا عينيا.

Jiritaanka iyo mid ahaanta, iyo horraynta oo ah billow la'aanta, iyo baaqi ahaanta, iyo in uu naftiisa u taaganyahay, iyo awoodda, iyo doonista, iyo aqoonta, iyo maqalka, iyo aragga, iyo nolosha, iyo hadalka, iyo in uu dhacdooyinka ka duwan yahay. Kolka markii astaamahaas in badan lagu xusay kutubta sharciga, ayaa culumadu dheheen: Waxaa waajib ah in uu qof kastaa bartaa sifooyinkaas.

فلما ثبتت الأزلية لذات الله وجب أن تكون صفاته أزلية لأن حدوث الصفة يستلزم حدوث الذات.

Haddaba kolkii ay billow la'aantu (azali) Eebbe u sugnaatay ayaa waxaa waajib noqday in ay astaamihiisu (sifooyinkiisu) kuwo aan billow lahayn (azali ah) ahaadaan, maxaa wacay asataantu haddii ay wax dhacay tahay (xaadith), naftuna (thaat) waxay noqonaysaa wax dhacay.

ومعنى أشهد أن محمدا رسول الله أعلم وأعتقد وأعترف أن محمد بن عبد الله بن عبد المطلب بن هاشم بن عبد مناف القرشي صلى الله عليه وسلم عبد الله ورسوله إلى جميع الخلق ويتبع ذلك اعتقاد أنه ولد بمكة وبعث بها وهاجر إلى المدينة ودفن فيها.

Ujeedada "waxaan ka markhaati ahay in Muxamad rasuulkii Alle yahay" waa waxaan ogahay oo rumaysnahay oo aan sugayaa in Muxamad ina Cabdullaahi ina Cabdul Mudalib ina Hashim ina Cabdul Manaaf ee reer Quraysh Nabadgelyo iyo Naxariisi korkiisa ha ahaatee uu yahay addoonkii Alle iyo nabigiisi kaas oo loo soo diray dhammaan uunka. Waxaana intaa raacaya, in la rumeeyo, in uu Maka ku dhashay halkaasna laga soo baxshay, uuna Madiina u haajiray halkaasna lagu aasay.

ويتضمن ذلك أنه صادق في جميع ما أخبر به وبلغه عن الله تعالى، فمن ذلك: عذاب القبر وتعيمه وسؤال الملكين منكرٍ ونكيرٍ والبعث والحشر والقيامة والحساب والثواب والعذاب والميزان والنار والصراط والحوض والشفاعة والجنة والرؤية لله تعالى بالعين في الآخرة بلا كيفٍ ولا مكانٍ ولا جهةٍ لا كما يرى المخلوق، والخلودُ فيهما.

Waxaa kale oo kaasi caddaynayaa in uu runlow ku ahaa dhammaan wixii uu shaagay oo uu Eebbe waynaayee xaggiisa inaga soo gaarsiiyay: Waxaana ka mid ah: cadaabta

qabriga iyo barwaaqadiisa, iyo su'aasha labada malak Munkar iyo Nakiir, iyo soo bixinta (bacthiga), iyo kulminta (xashriga), iyo qiyaamaha, iyo xisaabta iyo abaalmarinta (thawaabta) iyo cadaabta, iyo miisaanka iyo naarta iyo waddada (siraadka) iyo xawdka iyo shafaacada iyo jannada iyo aragtida Eebbe waynaayee isha lagu arkayo aakhiro qaab la'aan iyo meel laan iyo aag la'aan si aan ahayn sida loo arko uunka. Iyo in Jannada iyo Naarta dhexdooda lagu waarayo.

وَالْإِيمَانُ بِمَلَائِكَةِ اللَّهِ وَرُسُلِهِ وَكُتُبِهِ وَبِالْقَدَرِ خَيْرِهِ وَشَرِّهِ. وَأَنَّهُ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ خَاتَمُ النَّبِيِّينَ وَسَيِّدُ وَلَدِ آدَمَ أَجْمَعِينَ. وَيَجِبُ اعْتِقَادُ أَنَّ كُلَّ نَبِيٍّ مِنْ أَنْبِيَاءِ اللَّهِ يَجِبُ أَنْ يَكُونَ مُتَصِفًا بِالصِّدْقِ وَالْأَمَانَةِ وَالْفِطَانَةِ فَيَسْتَحِيلُ عَلَيْهِمُ الْكُذْبُ وَالْخِيَانَةُ وَالرِّذَالَةُ وَالسَّفَاهَةُ وَالْبِلَادَةُ وَالْجَبْنَ وَكُلُّ مَا يَنْفِرُ عَنْ قَبُولِ الدَّعْوَةِ مِنْهُمْ، وَتَجِبُ لَهُمُ الْعِصْمَةُ مِنَ الْكُفْرِ وَالْكَبَائِرِ وَصِغَائِرِ الْخِيسَةِ قَبْلَ النَّبُوَّةِ وَبَعْدَهَا.

Iyo malaa'ikta Alle oo la rumeeyo, iyo Nabiyaashiisa iyo kutubtiisa iyo qadderka khayrkiisa iyo shartiisa. Iyo in Nabigu nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee uu yahay nabiyaasha kii lagu dhammaystiray iyo in uu yahay sayyidkii intii nabi Aadam dhalay dhammaan. Waxaa waajib ah in la rumeeyo in nabi kasta oo nabiyaada Alle ka mid ah ay waajib tahay in uu ahaado mid runlow ah, oo ammaano leh, oo caqlilow ah, kolka waxaa ka reebban beenta iyo khayaanada iyo ardaalnimada iyo dabbaalnimada iyo garaad yarida, iyo fulaynimada iyo wax kasta oo diidaya dacwada ka aqbaliddooda, waxaana u waajibaya Alle ka magangelsho kaafirnimada iyo dambiyada waawayn iyo dambiyada yaryar nabinimada ka hor iyo kadibba.

ويجوز عليهم ما سوى ذلك من المعاصي لكن يُنبهون فوراً للتوبة قبل أن يقتدي بهم فيها غيرهم. فمن هنا يُعلم أن النبوة لا تصح لإخوة يوسف الذين فعلوا تلك الأفعال الخسيسة وهم من سوى بنيامين. والأسباط الذين أنزل عليهم الوحي هم من نبي من ذريتهم.

Waxaa bannaan in ay nabiyaasha ka dhacaan gafaf kale oo aan ahayn kuwa kor lagu soo sheegay, hase ahaatee, si degdeg ah ayaa loogu baraarujiyaa si ay u towba keenaan inta aaney ku dayan dadka kale.

Halkan ayaana laga ogaan karaa in aanay nabinimadu u suurtoobayn nabi Yuusuf walaalihiis, kuwaas oo falay falalkii xumaa, waxayna ahaayeen Binyaamiin mooyee inta kale. Asbaadda (dhasha) waxyiga lagu soo dejiyayna waa inta loo waxyooday ee dhashooda ahayd.

فصل: يجب على كل مسلم حفظ إسلامه وصونه عما يفسده ويبتله ويقطعه وهو الردة والعياذ بالله تعالى، قال النووي وغيره: "الردة أفحش أنواع الكفر". وقد كثر في هذا الزمان التساهل في الكلام حتى إنه يخرج من بعضهم ألفاظ تخرجهم عن الإسلام ولا يرون ذلك ذنبا فضلا عن كونه كفرا، وذلك مصداق قوله ﷺ:

CUTUB: Waxaa qof kasta oo muslim ah ku waajib ah in uu dhowro islaamkiisa kana ilaalsho wixii doorinaya oo duminaya oo goynaya waana riddada Eebbe kor ahaayee baannu ka magangalnee, Nawawi wuxuu yiri: "Riddadu way tan ugu xun jaadadka kufriga". waxaana batay waayahan fududaysiga hadalka dadka qaar afkooda ka soo baxayo erayo ka bixinaysa Islaamka aanayna u arag waxaa dambi iskaba daa in uu ahaado kufriye, taasina waa dhabtii hadalkii nabigeenna (ﷺ) Ee ahaa:

"إن العبد ليتكلم بالكلمة لا يرى بها بأسا يهوى بها في النار سبعين خريفا" أي مسافة سبعين عاما في التزول وذلك منتهى جهنم وهو خاص بالكفار. والحديث رواه الترمذي وحسنه. وفي معناه حديث رواه البخاري ومسلم. وهذا الحديث دليل على أنه لا يشترط في الوقوع في الكفر معرفة الحكم ولا إنشراح الصدر ولا اعتقاد معنى اللفظ كما يقول كتاب "فقه السنة".

"Addoonku waxaa dhacda in uu ku hadlo weedh aanuu u arag wax belo ah kuna hoobisa naarta toddobaatan gu" oo looga jeedo in fogaanteedu tahay toddobaatan sano in loo socdo oo hoobad ah halkaasina waa jahannama salkeeda oo ah meel u gaar ah kufaarta. Xadiiskana waxaa soo weriyay Tirmadi wuuna wanaajiyay, waxaana la ujeedo ah xadiis ay soo weriyeen Bukhaari iyo Muslim. Xadiiskan ayaana u daliil ah in aaney shardi u ahayn kufri ku dhicidda xukumka aqoontiisu ama qalbi qaboojinta ama ictiqaadka macnaha erayga sida uu sheegay kitaabka "Fiqh as-Sunnah"¹.

¹ Waa kitaab uu qoray Sayyid Saabiq, wuxuu ka mid ahaa Akhwaanka kadibna wuu ka baxay markii Akhwaanku isku khilaafay ciddii xukumi leheed kooxda kadib markii la dilay Xasan al-Banna, kitaabkan wuxuu ku sheegay in aan qofku kufrinayn haddii uusan u kasin oo uusan kufri qalbiga gashan, laakiin taasi shardi ma aha sida aan ognahay, maxaa yeelay shardiga qalbigashiga waxaa loo shardiya qofka la khasbayo, macnaha haddii qof lagu khasbo in uu kufriyo oo la yiraahdo ama kufri ama waan ku dilaynaa ee uu yiraahdo waan kufriyay asiga oo aan kufri qalbiga gashan kufrin maayo, laakiin qofkii asiga oo aan cidna khasbin ku dhawaaqa eray kufri ah ama qalbiga ha gashado ama yuusan gashan ee wuu kufrinayaa, waana taas midda uu ku khalday Sayid Saabiq oo labada mas'alo ayuu isku kahay.

وكذلك لا يشترط في الوقوع في الكفر عدم الغضب كما أشار إلى ذلك النووي، قال: "لو غضب رجل على ولده أو غلامه فضربه ضربا شديدا فقال له رجل: أأنت مسلم؟ فقال: لا، متعمدا كفر" وقاله غيره من حنفية وغيرهم.

Sidoo kale shardi uma aha kufriga ku dhiciddiisa carala la'aantu sida uu Nawawi sheegay, wuxuu yiri: "Haddii nin ku xanaaqo wiilkiisa ama qowsaarkiisa ee uu dilo dil aad u daran ee kolkaa nin ku yiraahdo: miyaadan muslim ahayn? Ee uu yiraahdo: maya, asiga oo u kasaya wuu gaalobay" sidaa ayayna dhaheen kuwa kale oo xanafiyada ka mid ah iyo kuwo kale.

والردة ثلاثة أقسام كما قسمها النووي وغيره من شافعية وحنفية وغيرهم: اعتقادات وأفعال وأقوال وكل يتشعب شعبا كثيرة.

Riddaduna waa saddex qaybood, sidii uu u qaybshay nawawi¹ iyo qaar kale oo shaaficiyo iyo xanafiyo ah, waana: waxyaabaha la rumaysanyahay, iyo falalka iyo oraahda, dhammaanna waxay u kala baxaan qaybo kale.

فمن الأول: الشك في الله أو في رسوله أو القراء أو اليوم الآخر أو الجنة أو النار أو الثواب أو العقاب أو نحو ذلك مما هو مجمع عليه أو اعتقاد قدم العالم وأزليته بجنسه وتركيبه أو بجنسه فقط.

Qaybta hore waxaa ka mid ah: in Alle laga shakiyo ama nabigiisa ama quraanka ama maalinta qiyaamaha ama jannada ama naarta ama abaalmarinta ama ciqaabta iyo wixii la mid ah oo ka mid ah waxyaabaha la isku raacsanyahay ama in la rumeeyo in dunidu soo jireen tahay nooceeda iyo qaabkeeduba ama nooceeda oo kaliya.

أو نفي صفة من صفات الله الواجبة له إجماعا ككونه عالما أو نسبة ما يجب تزيهه عنه إجماعا كالجسم.

Ama diididda astaan ka mid ah astaamaha Ilaahay u waajibay ee la isku raacsanyahay, sida in Alle yahay ogaal-badne (caalim), ama in loo saarsho waxyaabaha ay waajibka tahay in laga hufo ee la isku raacsanyahay sida jismiga².

أو تحليل محرم بالإجماع معلوم من الدين بالضرورة مما لا يخفى عليه كالزنا واللواط وقتل المسلم والسرقة والغصب. أو تحريم حلال ظاهر كذلك كالبيع والنكاح. أو نفي وجوب

¹ Nawawi: waa Skeekh Muxyidiin Abu Zakariya Yaxya bin Sharaf al-Nawawi, wuxuu dhintay 676H.

² Culumadu waxay isku raacsanyihiin in aanan Ilaahay waynaayee uusan jismi ahayn, jismiguna waa wax la taaban karo oo dherer iyo ballac iyo jog leh, marka waxaa waajib ah in taas Alle ka hufnaado oo laga nazaho.

مجمع عليه كذلك. كالصلوات الخمس أو سجدة منها والزكاة والصوم والحج والوضوء أو إيجاب ما لم يجب إجماعاً كذلك.

Ama xalaalaynta wax xaaraan ah, oo la isku raacsanyahay waxyaabaha diinka lama huraankiisa ahna ka mid ah, oo ah waxyaabaha aanan qofka ka qarsoomayn, sida dhillaysiga iyo qaniisnimada iyo dilka muslimka iyo boobka iyo xatooyada, ama xaaraamaynta wax xalaal muuqata ah sida ganacsiga iyo guurka.

Ama diididda wax waajib ah oo la isku raacsanyahay. Sida Salaadaha shanta ah ama sujuud ka mid ah salaadahaas, ama sekada iyo soonka iyo xajka iyo waysada ama in waajibinta wax aanan waajib laysku raacsanyahay ahayn.

أو نفى مشروعية مجمع عليه كذلك. أو عزَمَ على الكفر في المستقبل أو على فعل شيء مما ذُكر أو تردّد فيه، لا خُطوره في البال بدون إرادة. أو أنكر صحبة سيدنا أبي بكر رضي الله عنه أو رسالة واحد من الرسل المجمع على رسالته.

Ama diididda wax sharci ah oo la isku raacsanyahay, ama inla doono in la kufriyo mustaqbalka ama in la falo qaar ka mid ah waxyaabaha la soo sheegay ama laga laba labeeyo, kufrina maaha haddii waxyaabahaasi laabta ku soo dhacaan ayada oo aanan kas loo doonan. Ama beensha saxaabinimada Abu Bakar allaha ka raalli noqdee ama nabinimada mid ka mid ah nabiyaasha la isku raacsanyahay nabinimadooda.

أو جحد حرفاً مجمعا عليه من القرآن أو زاد حرفاً فيه مجمعا على نفيه معتقدا أنه منه عنادا. أو كذب رسولا أو نقصه أو صغّر اسمه بقصد تحقيره. أو جوز نبوة أحد بعد نبينا محمد ﷺ.

Ama diididda eray ka mid ah erayada quraanka ee la isku raacsanyahay amaku dara eray la isku raacsanyahay diidmadiisa asiga oo rumaysan in uu quraanka ka mid ayahay. Ama uu beensho nabi ama hoos u dhigo ama magaciisa yareeyo asiga oo liidid ula jeeda. Ama uu banneeyo nabinimada qof kale nabigeennii Muxamad ahaa kadib, nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee.

والقسم الثاني: الأفعال كسجودٍ لصنم أو شمس إن كان على وجه العبادة لها أو غير ذلك، والسجود لغيرهما إن كان على وجه العبادة له، أو مخلوق آخر على وجه العبادة له كسجود بعض الجهلة لبعض المشايخ المتصوفين، أي إذا كان سجودهم على وجه العبادة لمشايخهم فإنه يكون عندئذ كفراً وإن لم يكن على وجه العبادة لهم لا يكون كفراً لكنه حرام.

Qaybta labaadna: waa falalka sida sanam ama qorrax in loo sujuudo, haddii cibaadadooda looga jeedo ama wax kale, ama wax kale loo sujuudo haddii cibaado looga jeedo, sida sujuudda ay aqoonlaawayaasha qaarkood u sujuudayaan

sheekhyadooda suufiyada ah, taas oo ah haddii sujuuddu tahay mid cibaado sheekhyadooda la caabudayo looga jeedo waxay noqonaysaa kufti haddii uusan mid cibaado looga jeedo ahayna kufri noqon maayo laakiin waa xaaraan.

والقسم الثالث: الأقوال وهي كثيرة جدا لا تنحصر منها: أن يقول لمسلم يا كافر أو يا يهودي أو يا نصراني أو يا عديم الدين مريداً بذلك أن الذي عليه المخاطب من الدين كفرٌ أو يهودية أو نصرانية أو ليس بدين لا على قصد التشبيه.

Qaybta saddexaadna waa oraaahda aad ayuuna u badantahay, waxaana ka mid ah in qofku ku yiraahdo qof muslim ah: gaalyahow, ama yahuudiyahow, ama kirishtaanyahow, ama diinlaawayahow, asiga oo taas uga jeeda in qofka uu la hadlayo uu gaaloobay ama yahuudiyobay ama kirishtaamay ama uusan diinba haysan, kaftanna aanuu uga jeedin.

وكالسخرية باسم من أسماء الله تعالى أو وعده أو وعيده ممن لا يخفى عليه نسبة ذلك إليه سبحانه. وكان يقول: لو أمرني الله بكذا لم أفعله أو لو صارت القبلة في جهة كذا ما صليت إليها أو لو أعطاني الله الجنة ما دخلتها مستخفاً أو مظهراً للعناد في الكل.

Ama uu ku jeesjeeso magic ka mid ah magacyada Eebbe kor ahaayee, ama ballanqaadka Eebbe ama goodintiisa, qofkii aanay waxyaabahaas in Eebbe nasahnaayee loo saarsho ka qarsoonayn.

Ama uu yiraahdo: haddii Eebbe I fari lahaa sidaa ma faleen, ama haddii qibladu aagg hebel xigi lahayd umaba tukadeen, ama haddii Eebbe jannada isiin lahaa ma galeen, asiga oo ku jeesjeesaya ama madax adayg uga jeeda waxaas oo dhan.

وكان يقول لو ءاخذني الله بترك الصلاة مع ما أنا فيه من المرض ظلمني أو قال لفعل حدث هذا بغير تقدير الله. أو لو شهد عندي الأنبياء أو الملائكة أو جميع المسلمين بكذا ما قبلتهم.

Ama uu yiraahdo: Haddii Ilaahay ii cadaabo salaadda aan ka tegay aniga oo jirradani I hayso, wuu I dulmiyay. Ama uu fal dhacay yiraahdo kani kani qadder Alle kuma dhicin.

Ama uu yiraahdo: Haddii ay nabayaasha iyo malaa'iktu ka markhaati kacaan waxaa ama muslimiinta oo dhan kama yeeleen.

أو قال لا أفعل كذا وإن كان سنة بقصد الاستهزاء. أو لو كان فلان نبيا ما ءامنت به. أو أعطاه عالم فتوى فقال أيش هذا الشرع مريداً الاستخفاف بحكم الشرع.

Ama uu yiraahdo: Waxaas fali mayo sunnaba haddii ay doonaan ha ahaadeene, asiga oo ku jeesjeesaya. Ama uu yiraahdo: haddii uu hebel nabi ahaan lahaa ma rumeeyeen. Ama uu caalim culumada ka mid ah fatwa siiyo ee kolkaa yiraahdo: waa maxay sharcigani, asiga oo uga danleh in uu xukunka sharciga ku jeesjeeso.

أو قال لعنة الله على كل عالم مريدا الاستغراق الشامل، أما من لم يرد الاستغراق الشامل لجميع العلماء بل أراد لعن علماء زمانه وكانت هناك قرينة تدل على ذلك لـ كما يظن بهم من فساد أحوالهم فإنه لا يكفر وإن كان كلامه لا يخلوا من المعصية.

Ama uu yiraahdo: culumada oo dhan nacladi ha ku dhacdo, asiga oo culumada oo dhan uga jeeda. Qofkii aanan uga in uu kobo culumada oo dhan ee doona in uu nacalado culumadii waagiisa noolayd ayna jirto tusmo caddaynaysa waxa lagu malaynayo ee ah in ay fasahaadsanaayeen, qofkaasi kufrin mayo, inkasta oo hadalkiisu uusan gaf ka marnayn.

أو قال أنا بريء من الله أو من الملائكة أو من النبي أو من الشريعة أو من الإسلام أو قال لا أعرف الحكم مستهزئاً بحكم الله. أو قال وقد مألأ وعاء: ﴿وَكأسا دهاقاً﴾¹ أو أفرغ شراباً: ﴿فكانت سراباً﴾². أو عند وزن أو كيل: ﴿وإذا كالوهم أو وزنوهم يخسرون﴾³.

Ama uu yiraahdo anigu Eebbe beri baan ka ahay, ama malaa'ikta, ama nabiga, ama shareecada, ama islaamka, ama yiraahdo garan mayo xukunka asiga oo ku jeesjeesaya xukunka Eebbe. Ama intuu weel buuxsho yiraahdo: "cabid wanaagsan"[*an-naba'*:34], ama cabitaan weel ka banneeyay ee yiri: "waxayna noqon dhalanteed"[*an-naba'*:20]. Ama marka wax la miisaamayo yiraahdo: "markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya"[*al-mudaffiin*:3].

أو عند رؤية جمع: ﴿وحشرناهم فلم نغادر منهم أحدا﴾⁴ بقصد الاستخفاف في الكل بمعنى هذه الآيات، وكذا كل موضع استعمل في القراءة بذلك القصد فإن كان بغير ذلك القصد فلا يكفر لكن قال الشيخ أحمد بن حجر الهيتمي: لا تبعد حرمة.

Ama uu arkay dad badan ee yiri: "waan soo kulminay dadkii annagoon cidna ka tegin"[*al-kaahf*:47]. Jeessjees ahaan dhammaan aayadaha macnahooda, sidoo kale dhammaan meelaha lagu adeegsaday quraanka ujeeddadaas oo kale, haddiise ujeeddadu taa ka duwantahay qofku kufrin mayo, hase ahaatee, sheikh Axmad bin Xajar allaha u naxariistee ayaa yiri: ma foga in hadalkaasi xaaraan yahay.

وكذا يكفر من شتم نبيا أو ملكا أو قال: أكون قواداً إن صليت أو ما أصبت خيراً منذ صليت أو الصلاة لا تصلح لي بقصد الاستهزاء.

Sidoo kale waa kufrinayaa qofkii nabi caaya ama malak ama yiraahda: waxaan noqonayaa dhillay haddaan tukado ama khayr ma arag intii aan tukanayay ama salaaddu iguma habboona jeesjees ahaan.

¹ سورة النبأ: 34

² سورة النبأ: 20

³ سورة المطففين: 3

⁴ سورة الكهف: 47

أو قال لمسلم: أنا عدوُّك وعدوُّ نبيك، أو لشريف أنا عدوُّك وعدوُّ جدك مریدا النبي صلى الله عليه وسلم، أو يقول شيئاً من نحو هذه الألفاظ البشعة الشنيعة.

Ama uu muslim ku yiraahdo: anigu nacabkaaga ayaan ahay iyo nacabka nabigaaga, ama shariif ku yiraahda anigu nacabkaaga ayaan ahay iyo nacabka awowgaa asiga oo uga jeeda nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, ama uu yiraahdo waxyaabo la mid ah erayadaa xunxun ee cambaaraynta ah.

وقد عد كثير من الفقهاء كالفقيه الحنفي بدر الرشيد والقاضي عياض المالكي رحمهما الله أشياء كثيرة فينبغي الاطلاع عليها فإن من لم يعرف الشر يقع فيه.

Fuqaho badan sida faqiihii xanafiga ahaa Bedru ar-Rashiid iyo al-qaadi Cayyaad ee maalikiyada ahaa labadaba Allaha u naxariistee ayaa tirshay waxyaabo badan (oo waxyaabaha lagu kufrinayo ka mid ah), kolka waxaa gudboon in la akhristo maxaa yeelay qofkii aanan sharta aqoonsan wuu ku dhacaa.

والقاعدة: أن كلَّ عقدٍ أو فعلٍ أو قولٍ يدل على استخفاف بالله أو كتبه أو رسله أو ملائكته أو شعائره أو معالم دينه أو أحكامه أو وعده أو وعيده كفر فليحذر الإنسان من ذلك جهده على أي حال.

Waxaana qaacido ah: in ictiqaad kasta ama fal ama oraah tusaya leedidda ama ku jeesjeesid Ilaahay ama kutubtiisa ama nabiyaashiisa ama malaa'iktiisa ama cibaadadiisa ama astaamaha diintiisa ama axkaamtiisa ama ballanqaadkiisa ama gooddintiisa uu kufri yahay marka haka digtoonaado dadku arrinkaas si kasta oo ay ahaataba.

يجب على من وقع في الردّة العود فوراً إلى الإسلام بالنطق بالشهادتين والإقلاع عمّا وقعت به الردة، ويجب عليه الندم على ما صدر منه والعزم على أن لا يعود لمثله.

Qofkii riddooba waxaa ku waajib ah in uu islaamka u soo laabto si degdeg ah asiga oo ku dhawaaqaya laba shahaado kana fogaanaya wixii riddada ku riday, waxaa kale oo ku waajibayay in uu ka shallaayo wixii uu falay iyo in uu niyaysto in aanuu mar labaad u noqon waxaa oo kale.

فإن لم يرجع عن كفره بالشهادة وجبت استتابته ولا يقبل منه إلا الإسلام أو القتل به ينفذه عليه الخليفة بعد أن يعرض عليه الرجوع إلى الإسلام، ويعتمد الخليفة في ذلك على شهادة شاهدين عدلين أو على اعترافه وذلك لحديث البخاري "من بدل دينه فاقتلوه"¹.

¹ رواه البخاري وغيره.

Haddii uusan kufriga ka soo laaban asiga oo ashahaadanaya waxaa waajib ah in towbad keen la yiraahdo lagamana aqbalayo wax aan Islaam ahayn ama waa la dilayaa waxaana fulinaya dilka khaliifada kadib kolka uu u bandhigo in uu u soo laabto Islaamka, khaliifaduna wuxuu arrinkaan u cuskanayaa markhaati ah laba qof oo caadil ah ama qofku asigu ictiraafo kufrigiisa taasna waxaa caddaynaya xadiiskii Bukhaari ee ahaa "Qofkii diintiisa beddela dila".

ويبطل بها صومه وتيممه ونكاحه قبل الدخول وكذا بعده إن لم يعد إلى الإسلام في العدة ولا يصح عقد نكاحه على مسلمة وغيرها، وتحرم ذبيحته ولا يرث ولا يورث ولا يصلى عليه ولا يُغسَل ولا يُكفَّن ولا يُدفن في مقابر المسلمين وماله فيء.

Riddadu waxay burrinaysaa soonka qofka iyo tayamumkiisa iyo nikaaxiisa inta uusan aqalgelin iyo kolka uu aqalgalo kadibba haddii uusan Islaamka u soo laaban inta cuddada lagu jiro, haweeney muslimad ah ama mid kalena¹ in uu guursado ma bannaana, waxaa kale oo xaaraan noqonaya wixii uu gawraco, mana dhaxlayo lamina dhaxlayo, lagumana tukanayo, lamana dhaqayo², kafanna la saari maayo³, muslimiinta qabuurahoodana lagu aasi mayo, maalkiisana muslimiinta ayaa leh.

أي لبيت المال إن كان بيت مال مستقيم أما إن لم يكن فإن تمكَّن رجل صالح من أخذه وصرفه في مصالح المسلمين فعل ذلك واليوم لا يوجد بيت مال مستقيم. الرؤساء الإسلاميون كثير منهم لا يعرفون أحكام الشريعة ومن عرف فلا يضع المال في مواضعه فلذلك إن استطاع الرجل الذي له علم من أخذ مال المرتد أخذه وصرفه في مصالح المسلمين.

Ujeeddadu waa in baytulmaalku leeyahay haddii baytulmaal toosani jiro, haddii uusan jirinna, haddii uu awoodo nin wanaagsani in uu hantidaa qabto oo ku baxsho maslaxadda muslimiinta waa in uu sidaa yeelo, maantana ma jiro baytulmaal toosan. Madaxda islaamka sheegta qaar badan oo ka mid ah ma garanayaan axkaamta shareecada, kii gartana hantida dhigi mayo meesheedii, sidaa darted haddii uu awoodo nin aqoon leh in uu hantida murtadka (qofka diinta ka noqda) qaato waa in uu qaato waana in uu ku baxsho maslaxadda muslimiinta.

المسلمون هم الذين ءامنوا بالله ورسوله وتخلوا عن الكفر. أما الإسلاميون فمعناه ينتسبون إلى الإسلام مع صحة العقيدة أو بدون صحة العقيدة كابن سينا والفارابي وابن رشد

¹ Kuwa kale waxaa laga wadaa haweenka oo dhan kuma xirmayaan ama muslim ha ahaadeen ama gaaloe'.

² Ujeeddadu waa in aanay waajib ahayn in la dhaqo, maxaa wacay dhaqidda waxaa xaq u leh muslimka, qofka murtadka ahna waajib ma aha in la dhaqo.

³ Kafanka waxaa mudan muslimka, waana marada qofku kolka uu dhinto lagu duubayo, kolka qofka murtadka ah waajib ma aha in la kafano.

الحفيد وأمثالهم فيعتبرون أنفسهم مسلمين وهم ليسوا مسلمين لأنهم كفروا لكن ينتسبون إلى الإسلام ولم ينتسبوا إلى دين آخر.

Muslimiinyu waa kuwii rumeeyay Ilaahay iyo Rasuulkiisa kufrigiina ka tegay. Islaam-sheegadkana ujeeddadiisu waa ku islaamka ku abtirsanaya ayaga oo caqiidadoodu toosantahay ama aysan caqiidadoodu toosnayn sida ibn Siinaa iyo al-Faaraabi iyo ibn Rushud kii inanka ahaa¹ iyo wixii la mid ah waxayna isu haystaan muslimiin ayaga oo aan muslimiin ahayn maxaa yeelay way kufriyeen hase ahaatee waxay ku abtirsanaan islaamka mana aysan sheegan diin kale.

فصل: يجب على كل مكلف أداء جميع ما أوجبه الله عليه ويجب عليه أن يؤديه على ما أمره الله به من الإتيان بأركانها وشروطه ويجتنب مبطلاته. ويجب عليه أمر من رءاه تارك شيء منها أو يأتي بها على غير وجهها بالإتيان بها على وجهها ويجب عليه قهره على ذلك إن قدر عليه.

Cutub: Qof kasta oo qaan gaar ah waxaa ku waajib ah in uu la yimaado wixii uu Eebbe ku waajibiyay, waxaa kale oo ku waajibaya in uu ula yimaado siduu Eebbe u faray ee ah in uu la yimaado wax walba tiirarkooda iyo shuruudahooda iyo in uu ka fogaado wixii burrinaya.

Waxaa qofka ku waajib ah in haddii uu arko qof waajibaadkiisa ka tegaya uu faro, ama uu arko qof sidii loogu talagalay si ka duwan u samanaya uu arko in uu fao in qofkaasi si toosan u gutto waajibaadkiisa. Waxaa kale oo ku waajib ah in uu qofkaas ku khasbo si uu u guto waajibkiisa haddii uu awood u leeyahay.

وإلا وجب عليه الإنكار بقلبه إن عجز عن القهر والأمر وذلك أضعف الإيمان أي أقل ما يلزم الإنسان عند العجز. ويجب ترك جميع المحرمات ونهي مرتكبيها ومنعه قهرا منها إن قدر عليه وإلا وجب عليه أن ينكر ذلك بقلبه. والحرام ما توعده الله مرتكبه بالعقاب ووعد تاركه بالثواب وعكسه الواجب.

Haddii uu wax kale awoodi waayo waxaa ku waajib ah in uu qalbigiisa ka kahdo, taasina waa iimaanka midka ugu liita waana waxa ugu yar ee qofka looga baahanyahay haddii uu wax kale awoodi waayo.

Waxaa kale oo waajib ah in laga fogaado dhammaan waxyaabaha xaaraanta ah, iyo in laga reebo qofkii falaya oo loo diido lana khasbo haddii uu awoodo, haddi kalena waxaa qofka ku waajib ah in uu arrinkaas qalbiga ka kahdo. Xaaraantuna waa waxyaabaha Ilaahay uu ugu goodiyay qofkii fala in uu ciqaabay, qofkii ka fogaadana uu u ballan qaaday abaal marin waana kasoo horjeedka waajibka.

¹ Waxaa jira laba ibn Rushud labadubana laba caalim bay ahaayen, mid ayaa awoowe ah kan kalena waa inankii midkaa hore inankiisu dhalay, marka midka hore wuxuu ahaa sheikh, kan dambena qaalli can ah ayuu ahaa laakiin wuxuu aad u bartay falsafadda siiba falsafaddii Aristo, wuxuuna aaminsanaa in caalamka nuxurkiisu soojireen yahay, sidaa darted ayaa sheekhu gaalnimo ugu xukumay.

Dahaarada iyo Salaadda باب الطهارة والصلاة

فصل: فمن الواجب خمس صلوات في اليوم واللييلة.

الظهر: ووقتها إذا زالت الشمس إلى مصير ظل كل شيء مثله غير ظل الاستواء.

والعصر: ووقتها من بعد وقت الظهر إلى مغيب الشمس.

المغرب: ووقتها من بعد مغيب الشمس إلى مغيب الشفق الأحمر.

العشاء: ووقتها من بعد وقت المغرب إلى طلوع الفجر الصادق.

الصبح: ووقتها من بعد وقت العشاء إلى طلوع الشمس.

Cutub: Waxaa waajib ah shan salaadood maalin iyo habeen kasta.

Duhurka: oo waqtigiisu yahay kolka qorraxdu marto dhinaca qorrax dhaca Inta laga gaaro kolka wax kasta hooskoodu la mid niqdo.

Iyo **Casirka:** oo waqtigiisu yahay waqtiga duhurka kadib inta qorraxdu ka dhacdo.

Maqribka: oo waqtigiisu yahay wixii ka dambeeya qorraxdhaca iyo intii daruurta casi ka qarsoonto.

Cishaha: oo waqtigiisu yahay waqtiga maqribka kadib iyo inta uu ka soo muuqanayo waaberigu.

Subaxa: oo waqtigiisu yahay waqtiga cishaha kadib inta qorraxdu ka soo baxdo.

فتجب هذه الفروض في وقتها على كل مسلم بالغ عاقل طاهر أي غير الحائض والنفساء.

فيحرم تقديمها على أوقاتها وتأخيرها عنه لغير عذر.

Kolka waxaa waajib ku ah in uu guto salaadahaas waqtigooda muslim kasta oo qaangaar ah caqlina leh daahirna ah ujeedaduna waa inta aan ahayn haweenayda xaylka qabta ama tan umusha ah.

Waxaana bannaanayn in waqtigeeda laga soo hormariyo ama laga daba mariyo cudurdaar la'aan.

فإن طرأ مانع كحيض بعد ما مضى من وقتها ما يسعها وطهرها لنحو سلسٍ لزمه

قضاؤها.

Haddii uu yimaado lamafilaan sida xaylka kadib kolkii waqtigii in ku filan salaadda iyo is daahirinta sida qofka kaadi-diririqa qaba waxaa waajib ah in la qalleeyo.

أو زال المانع وقد بقي من الوقت قدر تكبيرة لزمته، وكذا ما قبلها إن جمعت معها،

فيجب العصر مع الظهر إن زال المانع بقدر تكبيرة قبل الغروب، والعشاء مع المغرب

يادراك قدر تكبيرة قبل الفجر.

Ama ay wixii salaadda u diidayay dhamaadeen waqtigiina uu ka haray in ku filan hal takbiitad waxaa waajib ah in uu guto, sidoo kale wixii salaaddaas ka horreeyay haddii lala tukado, kolka casarku wuxuu la waajibayaa dukurka haddii waixii salaadda

celinayay ay dhamaadaan waqtigana uu ka haro hal takbiro in ku filan inta aanan qorraxdu dhicin. Cishuhuna maqribka ayuu la waajibayaa haddii qofku haleelo takbiirad in ku filan waqtigeeda inta aanan waagu beryin.

فصل: يجب على ولي الصبي والصبية المميزين أن يأمرهما بالصلاة ويعلمهما أحكامها بعد سبع سنين قمرية ويضربهما على تركها بعد عشر سنين كصوم أطاقاه.

Chashar: waxaa ku waajib ah qofka mas'uulka ka ah carruurta caraadsaday in uu faro salaadda oo uu baro axkaamtooda kolka ay toddoba jirsadaan, uuna ku garaaco haddii ay ka tagaan haddii ay toban jirsadaan sida soonka haddii ay awoodaan.

ويجب عليه أيضا تعليمهما من العقائد والأحكام يجب كذا ويحرم كذا ومشروعية السواك والجماعة. قال ابن الجوزي في كتابه حفظ العلم: الولد إن صار مميزا فإن أول ما يُعلمُ شيء في العقيدة ثم شيء في الطهارة ثم شيء من القرآن.

Waxaa kale oo ku waajib ah in uu ka baro caqiidada iyo axkaamta sidaa baa waajib ah iyo sidaa baa xaaraam ah iyo sharci ahaanta cadaysiga iyo jamaacada. Ibn al-Jawsi wuxuu kitaabkiisii "xifd al-cilm" ku yiri: haddii carruurta garaadsadaan waxa ugu horreeya ee la barayaa waa xogoo caqiidada ah kadibna arrimaha dahaarada kadibna xogoo quraan ah.

ويجب على ولاية الأمر قتل تارك الصلاة كسلا إن لم يتب وحكمه أنه مسلم.

Waxaana ku waajib ah mas'uuliinta in ay dilaan qofka salaadda ka taga caajisnimo haddii uusan towbad keenin xukunkiisuna waa muslimnimo.

ويجب على كل مسلم أمر أهله¹ بالصلاة وكل من قدر عليه من غيرهم.

Waxaana muslim kasta ku waajib ah in uu faro salaadda qoyskiisa iyo dhammaan inta uu awoodo ee kale.

فصل: ومن شروط الصلاة الوضوء وفروضة ستة:

الأول: نية الطهارة للصلاة أو غيرها من النيات المجزئة عند غسل الوجه أي مقترنة بغسله عند الشافعي، وتكفي النية إن تقدمت على غسل الوجه بقليل عند مالك.

Cutub: Salaadda shuruudaheeda waxaa ka mid ah waysaqaadka waajibkiisuna waa lix:

Kan koobaad: waa niyadda salaadda loo dahaaro qaadanayo ama wixi la mid ah ee gudaya kolka foolka la dhaqitago, waana in ay niyadu ku xiriirsanaato fooldhaqa sida shaafici qabo, waana bannaan tahay haddii niyadu wax yar ka hor marto fooldhaqa sida maalik qabto.

¹ Ahal: waxaa looga jeedaa, xaaska iyo carruurta iyo iwm.

الثاني: غسل الوجه جميعه من منابت شعر رأسه إلى الذقن ومن الأذن إلى الأذن شعرا وبشرا لا باطن لحية الرجل وعارضيه إذا كثفا.

Kan labaad: waa dhaqidda foolka dhammaantiisa laga soo billaabo halka ay timaha madaxu ka soo baxaan oo garka lagu tago iyo labada dhegood inta u dhaxaysa timo yo lud intaba, kuma jiraan timaha garka hoostooda iyo haareedkiisu haddii ay bataan.

الثالث: غسل اليدين مع المرفقين وما عليهما.

Kan saddexaad: waa gacmaha oo la dhaqo inta xusullada iyo wixi dushooda ah laga gaaro.

الرابع: مسح الرأس أو بعضه ولو شعرة في حده.

Kan afaraad: waa madaxa in la masaxo ama qaar ka mid ah haddii ay doonto hal tin ah oo madaxa ku taalla ha ahaatee.

الخامس: غسل الرجلين مع الكعبين أو مسح الخف إذا كملت شروطه.

Kan shanaad: waa labada lugood oo la dhaqo inta qoobabka laga gaarayo, ama la masaxo caga-gashiga haddii shuruudihisu dhamaystirantu.

السادس: الترتيب هكذا.

Kan lixaad: waa in sidaa la isugu xejjiyo.

فصل: وينقض الوضوء ما خرج من السبيلين غير المني. ومس قبل الآدمي أو حلقة دبره ببطن الكف بلا حائل.

Cutub: waxaana waysada burrinaya wixii ka soo baxa labada xumays middood intaan shahwada ka ahayn. Waxaa kale oo burrinaya aadanaha xumaystiisa hore oo la taabto ama weegaarka xumaysta dambe gacanta cad lagu taabto ayada oo aan wax ka xigin.

ولمس بشرة الأجنبية التي تُشْتَهَى.

Waxaa kale oo waysada burrinaya taabashada haweeney aan xigtadaada ahayn oo la raboonaayo.

وزوال العقل، لا نومٌ قاعدٌ ممكنٌ مقعدته.

Waxaa kale oo burrinaya garaadka oo taga oo hurdo uu qofku si fiican salka dhulka ugu haysto ahayn.

فصل: يجب الاستنجاء من كل رطب خارج من أحد السبيلين غير المني بالماء إلى أن يطهر المحل أو بمسحه ثلاث مسحات أو أكثر إلى أن ينقى المحل. وإن بقي الأثر، بقالع طاهر جامد غير محترم كحجر أو ورق ولو مع وجود الماء من غير انتقال وقبل جفاف. فإن انتقل عن المكان الذي استقر فيه أو جف وجب الماء.

Cutub: Waxaa waajib ah in la isaga xalo biyo qoyaan kasta oo ka yimaada labada xumays oo aan ahayn shahwada inta meesho calas ka noqonayso, ama la iska tiro saddex jeer iyo in ka badan inta meeshu calas ka noqonayso, inkasta oo raadku sii muuqdo.

Waxaana lagu istanjoonayaa wax waxtira oo daahir ah adagna qiimana aan lahayn sida dhagax ama xaasho inkasta oo biyo yaallaan haddii aanay najaasadu fidin ama qallalin.

Haddiise najasadu ka fiddo halkii ay ku tiillay ama qalasho waxaa waajib ah in biyo lagu xalo.

فصل: ومن شروط الصلاة الطهارة من الحدث الأكبر بالغسل أو التيمم لمن عجز عن الغسل والذي يوجبه خمسة أشياء: خروج المني والجماع والحيض والنفاس والولادة. وفروض الغسل اثنان: نية رفع الحدث الأكبر أو نحوها وتعميم جميع البدن بشرا وشعرا وإن كثف بالماء.

Cutub: Waxaa kale oo shuruudaha salaadda ka mid ah in waxyaabaha waawayn ee qabayska waajibinaya laga qabaysto ama laga gabagabbaysto qofkii aan awoodin in uu ka qabaysto, waxaana waajibinaya shan walxaato: shahwo soo baxda iyo isutagga ninka iyo naagta, iyo caadada haweenka, iyo dhiigga haweenka ka yimaada iyo dhalmada.

Waajibaadka qabayskuna waa labo: niyada si waxyaabaha waawayn iwm looga qabaysto iyo in biyo lagu ekeeyo dhammaan jirka ama korka ha ahaato ama timahae si kasta oo ay u badanyihiin.

فصل: شروط الطهارة:

- 1- الإسلام
- 2- والتميز
- 3- وعدم المانع من وصول الماء إلى المغسول
- 4- والسيلان

5- وأن يكون الماء مطهراً بأن لا يُسلب اسمه بمخالطة طاهر يستغني الماء عنه. أي بامتزاج شيء طاهر كالحليب والحبر وشبه ذلك، فلو تغير الماء به بحيث لا يسمى ماءً لم يصلح للطهارة.

وأما تغيره بما لا يستغني الماء عنه كأن يتغير بما في مقره أو ممره أو نحو ذلك مما يشق صون الماء عنه فلا يضر فيبقى مطهراً وإن كثر تغيره.

Cutub: shuruudda dahaaradu waa:

1. Islaamnimada
2. Iiyo qaangaar
3. Iyo in aan wax ka celinayaahi jirin biyaha si ay u gaaraan waxa la dhaqayo.
4. Iyo in ay biyuhu maaxaan.
5. Iyo in biyuhu ahaadaan kuwo wax daahirsha, waana in aanay doorsoomayn oo aan magacoodu isbedelin ayada oo uu ku darsoomayo wax kale oo daahir ah oo biyuhu ka dhanyihiin. Ujeedadu waa sida asiga oo ku dheehma wax daahir ah sida caanaha ama inqaasta iwm, haddiise ay doorsoomaan biyuhu dheehaas oo aanan biyaba kolkaa lagu magacaabi karin dahaaro kuma suubana.

Haddiise uu ku doorsoomo wax aanay biyuhu ka maarmayn, sida haddii ay ku doorsoomaan wax ku jira nagaadigooda ama surinkooda iwm ee ay dhib tahay in biyaha laga dhowro waxba dhibi mayaana biyuhuna kuwa wax daahiriya ayay ahaanayaan si kasta oo ay u doorsoomaan.

وأن لا يتغير بنجس ولو تغيرا يسيرا. وإن كان الماء دون القلتين اشترط أن لا يلاقيه نجس غير معفو عنه، وأن لا يكون استعمل في رفع حدث أو إزالة نجس.

Waana in aanay biyuhu najaasad gaartay awgeed u doorsoomin doorsoon yarba ha ahaadee. Haddii biyuhu laba qul ka yaryihiinna waa in uusan la kulmin wax aan najaaso aad u yar ahayn, waana in aanay ahaan kuwo loo adeegsaday qabays ama najaaso laysaga maydhay.

ومن لم يجد الماء أو كان يضره الماء تيمم بعد دخول الوقت وزوال النجاسة التي لا يعفى عنها بتراب خالص طهور له غبار في الوجه واليدين يرتبهما بضربتين بنية استباحة فرض الصلاة مع النقل ومسح أول الوجه.

Qofkii aan biyo helin ama ay biyuhu dhibayaan wuu gabagabaysan kadib marka waqtigu galo ee najaasada aan wax yar ahayni ba'do asiga oo adeegsan carro daahir ah oo bay leh asiga oo marinaya wajiga iyo labada gacmood iskuna xejinaya laba jeerna sacabaysan asiga oo niyaysan in uu waajibka salaadda guto asiga oo qaadan oo marin foolka qaybtiisa hore.

فصل: ومن انتقض وضوءه حرم عليه الصلاة والطواف وحمل المصحف ومسّه ويمكن من ذلك الصبي للدراسة.

Cutub: qofkii waysadu ka jabto waxaa ka xaaraan ah salaadda iyo dawaafka iyo qaadista musxafka iyo taabashadiisa, carruurta waxbaranaysana taasi way u bannaantahay.

ويحرم على الجنب هذه وقراءة القرآن. والمكث في المسجد وعلى الحائض والنفساء هذه والصوم قبل الانقطاع.

Qofka junubka qabana inta la soo sheegay oo dhan waa ka xaaraan iyo quraan akhriska iyo masjidka oo uu ku nagaado haweenayda xaylka iyo nifaasku hayaanna intaas oo dhan uma bannaana iyo soonka inta aanan dhiiggu ka joogsan.

وتمكن الزوج والسيد من الاستمتاع بما بين السرة والركبة قبل الغسل وقيل لا يحرم إلا الجماع.

Waxaa sidoo kale ka reebban gabadha dhiigga qabta in ay ninka ama kan leh (haddii ay tahay of la leeyahay) u ogolaato in ay uga raaxaystaan inta u dhaxaysa xuddunta iyo jilbaha qabayska ka hor, waxaa kale oo la yiri xaaraan ma aha wixii aan u tegidda ahayn.

فصل: ومن شروط الصلاة الطهارة عن النجاسة:

1 - في البدن

2 - والثوب

3 - والمكان

4 - والمحمول له كقنينة يحملها في جيبه.

Cutub: shuruudaha salaadda waxaa kale oo ka mid ah:

1. In najaasada laga xalo jirka
2. Iyo dharka
3. Iyo meesha
4. Iyo wixii la sito si dhalo jeebka uu ku sido.

فإن لاقاه نجسٌ أو محموله بطلت صلاته. إلا أن يلقيه حالا ويكون جامداً أو يكون معفوا عنه كدم جرحه.

Hadii ay najaaso taabato qofka ama wax uu sitay salaadiisu way jabaysaa. Haddii uusan isla markiiba iska tuurin oo ay ahayd najaaso qallalan ama ay ahayd wax yar sida dhiig ka yimid dhaawaciisa.

ويجب إزالة نجسٍ لا يعفى عنه بإزالة العين أي جرمها من طعم ولون وريح بالماء المطهر. والحكمية بجري الماء عليها، والنجاسة الحكمية هي التي لا يدرك لها لون ولا طعم ولا ريح.

Waxaa waajib ah in najaasadu haddii aanay wax yar ahayn la iska xalo ayada oo lagu dhaqayo lafteeda iyo wixii dhadhan iyo midab iyo ur ay leedahay biyo wax daahirsha, midda aan loo jeedinna korkeeda biyo lagu dareersho. Najaasada aan la arkayna waa midda aan la arki karin midabkeeda iyo dhadhankeeda iyo urkeeda.

والكَلْبِيَّةُ بغسلها سبعاً إحداهن ممزوجة بالتراب الطهور، والمزيلة للعين وإن تعددت واحدة. ويشترط ورود الماء إن كان قليلاً.

Najaasada aygana (iyo tan doofaarka) waxaa la dhaqayaa toddoba jeer oo mid ka mid ah ay ku dheehantahay carro wax daahirisa, dhaqidida tirta najaasadana si kasta oo loogu naqnaqo waa mid, waxaana shardi ah in biyuhu dareeraan haddii ay yaryihiin.

فصل: ومن شروط الصلاة:

- 1- استقبال القبلة
- 2- ودخول وقت الصلاة
- 3- والإسلام
- 4- والتميز: وهو أن يكون الولد بلغ من السن إلى حيث يفهم الخطاب ويرد الجواب.
- 5- والعلم بفرضيتها
- 6- وأن لا يعتقد فرضاً من فروضها سنة
- 7- والستر بما يستر لون البشرة لجميع بدن الحرة إلا الوجه والكفين وبما يستر ما بين السرة والركبة للذكر والأمة من كل الجوانب لا الأسفل.

Cutub: waxaa shuruudaha salaadda ka mid ah:

1. In qiblada loo jeesto
2. Iyo in la gaaro waqtigii salaadda
3. Iyo islaamnimo
4. Iyo garaadka: oo ah in carruurtu ay garto da' ay garanayaan hadalka oo ay ka jawaabayaan.
5. Iyo in la ogaaddo in salaaddu waajib tahay.
6. Iyo in aanuu qofku umalyn qaar waajibaadka salaadda ka mid ah in ay sunno yihiin.
7. Iyo in la isku asturo wax qarabaya jirka midabkiisa dhammaan jirka marwada intaan wajiga ahayn iyo labada gacmood iyo wax astura inta

xuddunta iyo jilibka u dhaxaysa ragga iyo gabadha jaariyadda ah oo dhinac walba ah oo aan hoos ahayn.

فصل: وتبطل الصلاة:

- 1- بالكلام ولو بحرفين أو بحرف مفهم إلا أن نسي وقل.
- 2- وبالفعل الكثير وهو عند بعض الفقهاء ما يسع قدر ركعة من الزمن وقيل ثلاث حركات متواليات والأول أقوى دليلاً.
- 3- وبالحركة المفردة.
- 4- وبزيادة ركن فعلي.
- 5- وبالحركة الواحدة للعب.
- 6- وبالأكل والشرب إلا أن نسي وقل.
- 7- وبنية قطع الصلاة.
- 8- وبتعليق قطعها على شيء.
- 9- وبالتردد فيه.
- 10- وبأن يمضي ركن مع الشك في نية التحرم أو يطول زمن الشك.

Cutub: Salaaddu waxay ku buraysaa:

1. Hadalka laba xarafba ha ahaadee ama xaraf la fahmayo haddii uusan qofku illoobin hadalkuna uusan yarayn.
2. Falka badan, fuqahada qaarna waxay qabaan in uu yahay wax qaadanaya hal ragco waqtigeed in la eg, waxaa kale oo la yiri: waa saddex nuuxsasho oo isku xigta kan hore ayaana daliil adag.
3. Iyo dhaqdhaqaaqa badan.
4. Iyo in lagu daro rukun fal¹ ah.
5. Iyo hal nuuxsi oo ciyaar ah.
6. Iyo Cunitaanka iyo cabitaanka, in uu illaabo oo uu yaryahay mooyaane.
7. Iyo in uu niyaysto salaandda ka bixiddeeda.
8. Iyo salaadda ka bixiddeeda oo uu wax kale ku xiro².
9. Iyo haddii uu ka labalabeeyo.
10. Ama uu rukun tukado asiga oo xirashadi ka shaki qaba ama shakigiisu dheeraado.

¹ Rukun fal ah waa sida rukuuca iyo sujuudda, kolka qofkii salaadda ku dara rukuuc dheeraad ah salaaddiisu way buraysaa.

² Macnaha haddii uu niyaysto in uu salaadda ka baxo haddii hebel yimaado inta uu salaadda ku jiro, salaaddiisu way buraysaa inta aanuu qofkaasi imaan.

فصل: وَشُرِّطَ مَعَ مَا مَرَّ لِقَبُولِهَا¹ عِنْدَ اللَّهِ سُبْحَانَهُ وَتَعَالَى أَنْ يَقْصِدَ بِهَا وَجْهَ اللَّهِ وَحْدَهُ وَأَنْ يَكُونَ مَأْكَلَهُ وَمَلْبُوسَهُ وَمَصْلَاهُ حَلَالًا وَأَنْ يَخْشَعَ لِلَّهِ قَلْبَهُ فِيهَا وَلَوْ لِحِظَةِ فَإِنْ لَمْ يَحْصُلْ ذَلِكَ صَحَّتْ صَلَاتُهُ بِلا ثَوَابٍ.

Cutub: waxaa inta la soo sheegay la jira in ay shardi u tahay aqbalka salaadda Ilaah agtiisa nasahnaayee oo kor ahaayee, in qofka uu salaadda xag Alle oo kaliya u niyaysto, iyo in uu ahaado quudkiisu iyo furkiisu iyo meesha uu ku tukanayo xalaal, iyo in qalbigiisu u khushuuco Ebbe inta uu salaadda ku jiro ilbiriqsiiba ha ahaatee, haddii aanay taasi dhicin, salaaddiisu way ansaxaysaa sawaab la'aan.

فصل: أركان الصلاة سبعة عشر.

الأول: النية بالقلب للفعل ويعين ذات السبب أو الوقت وينوي الفرضية في الفرض.

Cutub: Tiirarka (Arkaanta) salaaddu waa toddoba iyo toban.

Kan koobaad: waa niyada laabta loo gelsho falka sababtana iyo waqtigana garto, haddii ay farad tahayna farad ahaan u niyaysto.

الثاني: أن يقول بحيث يُسمع نفسه ككُلِّ ركن قولي الله أكبر.

Kan labaad: in uu yiraahdo asiga oo ismaqlaya rukun kasta oo qowli ah "Al-Laahu Akbar"²

الثالث: القيام في الفرض للقادر.

Kan saddexaad: waa taagnida faradka taagnida ah.³

الرابع: قراءة الفاتحة بالبسملة والتشديدات ويشترط موالاتها وترتيبها وإخراج الحروف من مخارجها وعدم اللحن المخل بالمعنى كضم تاء أنعمت ويحرم اللحن الذي لم يخل ولا يبطل.

Kan afaraad: waa akhriska faatixada ayada oo bisinka laga billaabayo iyo shidadkeeda, waxaana shardi ah in la isku xiriirsho akhriska la iskuna xejiyo xuruuftana sifiican loogu dhawaaqo laxni ujeedada leexshana aan lagu derin sida godidda ta'da "ancamta"⁴, laxniga aanan ujeedada leexinayn asiguna waa xaaraan laakiin salaadda burrin mayo.

الخامس: الركوع بأن ينحني بحيث تنال راحته ركبتيه.

¹ يجوز أن يقال قبول لكن الفتح أحسن.

² Rukunka qowliga ah waa midka loo baahanyahay in lagu dhawaaqo ayada oo qofku uu codkiisa maqlayo, waana takbiirta xirashada (takbiirta ixraamka), iyo faatixada akhriskeeda iyo attaxyaadka dambe iyo Nabiga oo lagu salliyo, haddii uu qofku afka nuuxnuuxsho oo waxa uu sheegayo aanuu maqlayn laftiisu taasi ansixin mayso salaaddiisa. Salaadda takbiiradaheeda oo dhanna waa sunno inta aanan takbiirta xirashada ka ahayn.

³ Joogsidu waa tiir ka mid ah tiirarka salaadda qofkii awooda, qofkii aan awoodinna lagama rabo.

⁴ Faataxada aayadda toddobaad ayay ku jirtaa kelimadda "ancamta" kolka haddii qofku yiraahdo "ancamtu" ee uu godo ta'da macnuhu wuu xumaanayaa waana laxni leexinaya ujeedadii aayadda, kaasi kolka salaadda wuu burrinayaa.

Kan shanaad: waa rukuuca waana in uu rugmado inta sacabbadiisu ka gaaraan labadiisa jilib.

السادس: الطمأنينة فيه بقدر سبحان الله وهي سكون كل عظم مكانه دفعة واحدة.

Kan lixaad: waa in lagu nagaado (rukuuca) in la eg "subxaana allaahi". Waana in xubin kasta meesheeda ku nagaato mar kali ah.

السابع: الاعتدال بأن ينتصب بعد الركوع قائما.

Kan doddobaad: waa joogsiga, waana in uu istaago qofku rukuuca ka dib.

الثامن: الطمأنينة فيه.

Kan siddeedaad: waa in lagu nagaado joogsiga.

التاسع: السجود مرتين بأن يضع جبهته كلها أو بعضها على مصلاه مكشوفة ومتاقلا بها ومنكسا أي يجعل أسافله أعلى من أعاليه، ويضع شيئا من ركبتيه ومن بطون كفيه ومن بطون أصابع رجليه.

Kan sagaalaad: Waa in uu sujuudo laba jeer, asiga oo foolkiisa oo faydan dhammaantiis ama qaar ka mid ah dhigaya meesha uu ku tukanayo, culayskana saaraya, oo foorarsanaya, ujeedadu waa in uu qaarkiisa dambe ka kormarinayo qaarkiisa hore.

وقال بعض العلماء خارج المذهب ليس شرطا في السجود التنكيس فلو كان رأسه أعلى من دبره صحت الصلاة عندهم.

Culumada qaar -mad-habta ka baxsan- waxay dhaheen: shardi ma aha sujuudda in la foorarsado, haddii uu madaxiisu ka sarreeyo qaarkiisa dambe, salaaddu waa ansaxaysaa sida ay qabaan.

العاشر: الطمأنينة فيه.

Kan tobnaad: waa in lagu nagaado sujuudda.

الحادي عشر: الجلوس بين السجدين.

Kan kow iyo tobnaad: waa in la fariisto labada sujuudood dhexdooda.

الثاني عشر: الطمأنينة فيه.

Kan laba iyo tobnaad: waa in lagu nagaado fadhiga.

الثالث عشر: الجلوس للتشهد الأخير وما بعده من الصلاة على النبي والسلام.

Kan saddex iyo tobnaad: waa in loo fariisto attaxyaadka dambe iyo wixii ka dambeeya ee ah nabiga oo lagu salliyo.

الرابع عشر: التشهد الأخير فيقول التحيات المباركات الصلوات الطيبات لله السلام عليك أيها النبي ورحمة الله وبركاته السلام علينا وعلى عباد الله الصالحين أشهد أن لا إله إلا الله وأشهد أن محمدا رسول الله أو أقله وهو التحيات لله سلام عليك أيها النبي ورحمة الله وبركاته سلام علينا وعلى عباد الله الصالحين أشهد أن لا إله إلا الله وأن محمدا رسول الله.

Kan afar iyo tobnaad: Waa attaxyaadka dambeK kolkaas buu leeyahay qofku: "*at-taxiyaatu al-mubaarakaatu as-salawaatu ad-dayyibaatu lillaahi as-salaamu calayka ayyuhaa an-nabiyyu wa raxmatullaahi wa barakaatuh as-salaamu calaynaa wa calaa cibaadillaahi as-saalixiin ash-haddu an laa ilaaha illaa allaahu wa ash-haddu anna muxamadan rasuulullaahi*" ama inta ugu yare e ah "*at-taxiyaatu lillaahi salaamu calayka ayyuhaa annabiyu wa raxmatullaahi wa barakaatuh salaamun calaynaa wa calaa cibaadillaahi as-saalixiin as-haddu an laa ilaaha wa ash-haddu anna muxamadan rasuulullaahi*".

الخامس عشر: الصلاة على النبي وأقلها اللهم صل على محمد.

Kan shan iyo tobnaad: waa nabiga oo lagu salliyo waxaana ugu yar: "*al-laahumma salli calaa muxamad*".

السادس عشر: السلام وأقله السلام عليكم.

Kan lix iyo tobnaad: waa salaama naqsiga waxaana ugu yar: "*as-salaamu calaykum*"

السابع عشر: الترتيب فإن تعمد تركه كأن سجد قبل ركوعه بطلت، وإن سها فليعد إليه إلا أن يكون في مثله أو بعده فتتم به ركعته ولغا ما سها به، فلو لم يذكر تركه للركوع إلا بعد أن ركع في القيام الذي بعده أو في السجود الذي بعده لغا ما فعله بين ذلك.

Kan toddoba iyo tobnaad: Waa isku xejinta (arkaantaas), haddii qofku kas uga tago sida asiga oo sujuuda inta uusan rukuucin salaaddisu way buraysaa, haddii uu sahwiyaana waa in uu u noqdo (rukunkii uu ka soo tegay) inta uusan rukunka kale gaarin ama uu rukun kale ka gudbay oo ragcadii ku dhammaatay kana tegay wixii uu ku sahwiya, haddii uusan xasuusan, kolkaa waa in u laabto rukuucii haddii uusan gaarin rukuuca kale ee ka dambeeya joogsiga kale, ama haddii uusan gaarin sujuudda ka dambaysa wuxuu ka tegayaa intii uu sameeyay labadaa inta u dhaxaysa.

فصل: الجماعةُ على الذكور الأحرار المقيمين البالغين غير المعذورين فرض كفاية، وفي الجمعة فرض عين عليهم إذا كانوا أربعين مكلفين مستوطنين في أبنية لا في الخيام لأنها لا تجب على أهل الخيام.

Cutub: Jamaacadu waxay fardu kifaaya ku tahay raga xorka ah ee nagaadiga ah ee qaangaaray ee aanan wax cudurdaar ah lahayn¹.

Jimcaduna fardu-cayn bay ku tahay haddii (raggaas) tiradoodu afartan qaangaara oo deggan guryo yihiin aanna degganayn teendhooyin, maxaa yeelay jimcuhu dadka teendhooyinka deggan ku waajibi mayso.

وتجب على من نوى الإقامة عندهم أربعة أيام صحاح أي غير يومي الدخول والخروج، وعلى من بلغه نداء صيت من طرف يليه من بلدها.

Waxaa kale oo jamaacadu ku waajibaysaa qofkii niyaysta in uu ku nagaado agtooda afar maalmood oo dhamaystiran oo ka baxsanyihiin maalinta uu soo gelayo iyo maalinta uu baxayo. Waxaa kale ee ay ku waajibaysaa (jimcadu) qofkii maqlaya aadaanka dhinaca soo xiga ee degmada jimcadu ka jirto.

وشرطها:

✓ وقت الظهر.

✓ وخطبتان قبلها فيه يسمعهما الأربعون.

✓ وأن تصلى جماعة بهم.

✓ وأن لا تقارنها أخرى ببلد واحد.

Shardigeeduna waa:

- ✓ Waqtiga duhurka.
- ✓ Iyo laba khudbo oo ka horreeya (salaadda jimcaha) oo afartanka qof dhegaysanayaan.
- ✓ In ay jamaaco ku tukadaan (Jimcaha).
- ✓ In aanay isla markaa ka jirin khutbo kale isla magaaladaa lafteeda.

فإن سبقت إحداهما بالتحريم صحت السابقة ولم تصح المسبوقه هذا إذا كان يمكنهم الاجتماع في مكان واحد فإن شق ذلك صحت السابقة والمسبوقه.

¹ Fardu kifaayo: waa waajibka haddii muslimiinta qaar sameeyaan uu qaarka kale ka dhacayo waajibku. Fardu-cayn: waa waajibka qof kasta laga rabo in uu laftiisu gutto.

Haddii ay middood xirashada ku horrayso, middaa horraysa ayaa ansaxaysa, tan laga hormarayna ma ansaxayso, taasina waa haddi ay u suurta gelayso dadkaa in ay isugu yimaadaan, haddiise ay taasi dhib noqoto labaduba way ansaxayaan.

وأركان الخطبتين:

- ✓ حمد الله والصلاة على النبي صلى الله عليه وسلم. والوصية بالتقوى فيهما.
- ✓ وآية مفهومة في إحداهما.
- ✓ والدعاء للمؤمنين في الثانية.

Tiirarka labada khudbana waa:

- ✓ Mahadnaqa alle iyo nabiga nabadgelyo iyo naxariise korkiisa ha ahaatee oo lagu salliyo, iyo in labadoobada alle kacabsi la iskula dardaarmo.
- ✓ Iyo aayad la fahmayo oo la akhriyo inta lagu jiro labada khudbo middood.
- ✓ Iyo mu'miniinta oo loo duceeyo khudbada labaad dhexdeeda.

وشرطهما:

- ✓ الطهارة عن الحدثين وعن النجاسة في البدن والمكان والمحمول.
- ✓ وستر العورة.
- ✓ والقيام.
- ✓ والجلوس بينهما، والموالة بين أركانهما.
- ✓ وبينهما وبين الصلاة.
- ✓ وأن تكونا بالعربية.

Shuruudda labada khudbana waa:

- ✓ In laga daahir ahaado labada xumays (xadath) iyo najaasada jirka korkiisa ahaata meesha ama wixii la sido.
- ✓ Iyo cawrada oo la asturo.
- ✓ Iyo in qofka khudbaynaya istaago.
- ✓ Iyo labada khudbo dhexdooda oo la fariisto, iyo in tiirarkeeda (arkaanteedu) la isku xejiyo.
- ✓ Iyo in la xiriirsho (aan la kala dheerayn) khudbada iyo salaadda.
- ✓ Iyo in labada khudbo (arkaanteedu) af Carabi ahaato.

فصل: ويجب على كل من صلى مقتدياً في جمعة أو غيرها:

* أن لا يتقدم على إمامه في الموقف والإحرام، بل تُبطل المقارنة في الإحرام، وتكره في غيره إلا التأمين.

Cutub: Waxaana ku waajib ah qofkii ku xirta jimcaha ama salad kale:

* In uusan imaamka ka hor marin istaagga iyo xirashada, taa daaye, salaaddu waa buraysaa haddii imaamka lala dhaho xirashada, waana la kahdaa haddii lala dhaho mararka kale, intaan aamiinta ahayn.

* ويحرم تقدمه بركن فعلي وتبطل الصلاة بالتقدم على الإمام بركنين فعليين متوالين طويلين أو طويل وقصير بلا عذر.

وكذا التأخر عنه بهما بغير عذر، وبأكثر من ثلاثة أركان طويلة ولو لعذر، فلو تأخر لإتمام الفاتحة حتى فرغ الإمام من الركوع والسجودين فجلس للشهادة أو قام ترك إتمام الفاتحة ووافق الإمام فيما هو فيه وأتى بركعة بعد سلام إمامه، وإن أتمها قبل ذلك مشى على ترتيب نفسه.

* Waxaana xaaraan ah in imaamka rkun fal ah laga hormaro, salaadduna way ku buraysaa haddii imaamka laga hormaro laba rukun oo fal ah oo isku xiga oo dheer, Ama rukun dheer iyo mid gaaban cudurdaar la'aan.

Waxaana taa la mid ah in laga dib dhaco imaamka laba rukun cudurdaar la'aan, ama in kabadan saddex rukun oo dhaadheer cudurdaarba ha ahaadee, haddii uu qofku imaamka kadibdhaco si uu faatixada akhriskeeda u dhammeeyo, inta uu imaamku ka dhammeeyo rukuuca iyo labada sujuudood ee u fariisto attaxyaadka ama uu istaago, waa in uu qofku ka tago faatixada akhriskeeda oo uu haleelo imaamku halka uu marayo kadibna rakco la yimaado kolka imaamku salaama naqsado, hadduuse qofku dhameeyo akhriska faataxaad intaa ka hor wuxuu u soconayaa sidii salaaddiisu isugu xigtay.

* وأن يعلم بانتقالات إمامه.

* Waana in uu ogaado (Ma'muunku) dhaqdhaqaaqa imaamkiisa.

* وأن يجتمعا في مسجد وإلا ففي مسافة ثلاثمائة ذراع يدوية.

* Waana in ay ku kulmaan (Imaamka iyo ma'muunku) masjid dhexdii ama meel fogaanteedu tahay saddex boqol oo dhudhun oo gacanta ah.

* وأن لا يحول بينهما حائل يمنع الاستطراق.

Waana in uusan u dhaxayn teed aan laga gudbi karin.

* وأن يتوافق نظم صلاتيهما فلا تصح قدوة مصلي الفرض خلف مصلي صلاة الجنازة.

* Waana in ay islahaa to salaaddoodu, mana ansaxayso in uu ku xirto mid farad tukanaya mid salad janaaso tukanaya.

* وأن لا يتخلف عن الإمام في سنة تفحش المخالفة فيها كالتشهد الأول أي جلوسه فعلا وتركا أي إن جلس الإمام جلس المأموم وإن تركه قام معه.

Waana in aanuu (ma'muumku) kaga duwanaan imaamka sunno kala duwanaantu ku xuntahay sida attaxyaadka hore, ujeeddadu waa in ay fadhiga iyo joogsiga isku raacaan, haddii imaamku fariisto ma'muumkuna waa in uu fariisto haddii imaamku ka tagana ma'muumkuna waa in uu la istaagaa.

* وأن ينوي الإقتداء مع التحرم في الجمعة وقبل المتابعة في غيرها أي قبل أن يتابعه قصدا فإن تابعه بلا نية فسدت صلاته، سواء طال الانتظار أو لم يطل، حتى لو انتظره طويلا ولم يتابعه في الأفعال فلا تفسد. أمّا لو تابعه اتفاقا بلا قصد لم تبطل صلاته.

Waana in uu kuxirashada niyaysto kolka uu xiranayo jimcada, salaadaha kalena inta uusan ku dayan, ujeeddadu waa inta uusan kas ugu dayan, haddiise uu niyadla'aan ku daydo salaaddiisu way buri, ama in badan ha sugo ama yuusan sugine, inkasta uu wax badan sugo uusanna ku dayan falalkiisa salaaddiisu ma burayso. Haddiise uu kama' ugu daydo asiga oo aan u kasin salaaddiisu ma burin.

ويجب على الإمام نية الإمامة في الجمعة والمعادة وتسني في غيرهما.

Imaamkana waxaa ku waajib ah in uu niyaysto imaamnimada salaadda jumcada iyo nidda naqtiinka ah inta kalena waa loo sunneeyaa.

والمعادة هي الصلاة التي يصليها مرة ثانية بعد أن صلاها جماعة أو منفردا إذا وجد رجلا يصلي معه جماعة، أو صلى جماعة لكنه أراد أن يكسب رجلا جاء ليصلي حتى لا تفوته فضيلة الجماعة.

Salaadda naqtiinka ahna waa midda uu qofku tukanayo mar labaad asiga oo mar hore tukaday ama jamaaco la tukaday haddii uu helo nin jamaaco ahaan ula tukada , ama uu jamaaco ku tukaday hase ahaatee uu doonay in u yimid jamaacada u sameeyo si aan fadliga jamaacadu uga fakan.

غسل الميت وتكفينه والصلاة عليه ودفنه فرض كفاية إذا كان مسلماً ولد حياً، ووجب لدمي تكفيناً ودفناً ولسقط ميت غسل وكفن ودفن ولا يصلى عليهما.

Dhaqidda maydka iyo kafantiisa iyo salaadda lagu tukado iyo duugistiisu waa fard kifaayo haddii uu yahay muslim asiga oo nool dhashay. Gaal¹ haddii uu yahayna waxaa u waajib ah kafanka iyo duugta.

Haddii dhicis dhintay yahayna wuxuu xaq u leeyahay dhaqid iyo kafan iyo duug, laguna tukan mayo labadaa midna (gaalka iyo dhiciska).

ومن مات في قتال الكفار بسببه كفن في ثيابه فإن لم تكفه زيد عليها ودفن ولا يغسل ولا يصلى عليه.

Qofkii ku dhinta dagaalka gaalada (Jihaadka) dharkiisa ayaa lagu kafani haddii uu ku fillaan waayana waa loo kordhin. Waana la duugi lana dhaqi mayo laguna tukan mayo.

وأقل الغسل: إزالة النجاسة وتعميم جميع بشره وشعره وإن كثف مرة بالماء المطهر.

Dhaqiddana waxaa ugu yar: najaasada oo la xalo iyo jirkiisa oo dhan iyo timihiisa si kasta oo ay u badanyihiin in lagu ekeeyo hal mar biyo daahir ah.

وأقل الكفن: ساتر جميع البدن وثلاث لفائف لمن ترك تركة زائدة على دينه ولم يوص بتركها.

Kafantana waxaa ugu yar: mid dhammaan jirka oo dhan dedda iyo addex duub gofkii ka taga xoolo dheeraad ka ah dayntiisa aanna ka dardarmin in laga tago.

وأقل الصلاة عليه: أن ينوي فعل الصلاة عليه والفرض ويعين الميت ولو بالإشارة القلبية ويقول الله أكبر وهو قائم إن قدر ثم يقرأ الفاتحة، ثم يقول الله أكبر، ثم يقول اللهم صل على محمد، ثم يقول الله أكبر اللهم اغفر له وارحمه، ثم يقول الله أكبر، السلام عليكم.

Salaaddana waxaa ugu yar: in uu niyaysto falka salaadda ee uu korkiisa ku tukanayo iyo faradka (kifaayaha).

Wuxuuna si gaar ah u tilmaamayaa qofka dhintay haddii uu doono tilmaan laabta ah ha ahaatee.

Kolkaas ayuu leeyahay "Allaahu Akbar" asiga oo taagan, haddii uu awoodo, kadibna faatixada ayuu akhriyaa, kadibna wuxuu leeyahay "al-laahu akbar, al-lahuma salli calaa muxamad".

¹ Waxaa looga jeedaa qof aan muslim ahayn oo ku nool dhulka muslimku xukumo, haddii uu canshuurta baxsho wuxuu xaq u leeyahay in la duugo oo la kafano haddii uu dhinto.

Kadibna wuxuu leeyahay: "*al-lahu akbar, al-lahuma aqfir lahu war-xamhu*" kadibna wuxuu leeyahay "*al-lahu akbar, as-salamu calaykum*".

ولا بد فيها من شروط الصلاة وترك المبطلات.

Waxaana lagama maarmaan ah shuruudaha salaadda iyo in laga fogaado waxyaabaha burrinaya.

وأقل الدفن: حفرة تكتم رائحته وتحرسه من السباع، ويسن أن يعمق قدر قامة وبسطة ويوسع، ويجب توجيهه إلى القبلة. ولا يجوز الدفن في الفسقية.

Duugistana waxaa ugu yar god qarinya urkiisa kana dhowraysa dugaagga. Waxaana sunno ah in godka la dheereeyo qof jooggiis iyo gacma taagga, lana ballaarsho. Waxaana waajib ah in qiblada loo jeedsho. Mana bannaana in lagu duugo goobta fisqiga.

الزكاة

Sekada

وتجب الزكاة في:

- 1- الإبل. 2- والبقر. 3- والغنم. 4- والتمر. 5- والزبيب. 6- والزرع المقتاتة حالة الاختيار. 7- والذهب. 8- والفضة. 9- والمعدن. 10- والركاز منهما. 11- وأموال التجارة. 12- والفطر.

Sekadu waxay ku waajibaysaa: 1. geela. 2. iyo lo'da. 3. iyo ariga 4. iyo timirta. 5.iyo sabiibka. 6. iyo abuurka la quuto marka la doono. 7. iyo dahabka. 8. iyo qalinka. 9. iyo macdanta. 10. iyo ceeriinka labadaa. 11. iyo xoolaha ganacda. 12. iyo sekada fitriga.

- وأول نصاب الإبل خمس

- والبقر ثلاثون

- والغنم أربعون.

فلا زكاة قبل ذلك ولا بد من الحول بعد ذلك، ولا بد من السوم في كلاً مباح أي أن يربحها مالكها أو من أذن له في كلاً مباح أي مرعى لا مالك له، وأن لا تكون عاملة فالعاملة في نحو الحرث لا زكاة فيها.

- Sekadana waxaa laga qaadayaa geela haddii tiradiisu shan gaarto.
- lo'dana soddon.
- arigana afartan.

Intaa wax ka yarna seko lagama rabo, waana lagama maarmaan in dawgu u dhammaado, waana in ay xoolo daaq ah yihiin oo u soofaan daaq furan ujeedadu waa in qofka xoolaha leh ama qofka uu u dhiibtay daajiyo xoolaha daaq furan oo aanan cidna u gaar ahayn.

Waana in aanay ahayn gaadiid, maxaa wacay xoolaha beeraha lagu falo iwm seko kuma waajibto.

فيجب في كل خمس من الإبل شاة. وفي أربعين من الغنم شاة جذعة ضأن أو ثنية معز، وفي كل ثلاثين من البقر تبيع ذكر. ثم إن زادت ماشيته على ذلك ففي ذلك الزائد.

Kolka shan kasta oo geel ah waxaa ku waajib ah ri'. Afartankii ari' ahna sabayan ilka dhacsatay ama ceesaan laba jir ah baa ku waajibi. Soddonkii lo' ahna dibi gu' jir ah ayaa ku waajibi.

Haddii xoolohiisu intaa ka bataanna dheeraadka seko ayaa ku waajibaysa.

ويجب عليه أن يتعلم ما أوجبه الله تعالى عليه فيه.

Waxaana qofka xoolaha leh ku waajib ah in uu barto wixii Eebbe ku waajibshay korkiisa ee dhinaca xoolaha ah.

وأما التمر والزبيب والزروع فأول نصابها خمسة أوسق. وهي ثلاثمائة صاع بصاعه عليه الصلاة والسلام ومعياره موجود بالحجاز.

Timirta iyo sabiibka iyo miraha nisaabkeedu wuxuu ka billaabanayaa shan qul. Waana saddex boqol oo sacab oo ah sacabkii Nabigeenna nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee qiyaaskiisuna wuxuu yaallaa xijaas.

ويضم زرع العام بعضه إلى بعض في إكمال النصاب ولا يكمل جنس بجنس كالشعير مع الحنطة.

Wixii dowga soo go'ana waa la isu gayn si ay nisaabka u dhamaystiraan, laba jaad oo kala duwana la isku dhamaystiri mayo sida qamadiga iyo masaggada.

وتجب الزكاة: يبدو الصلاح بأن يبلغ حالة يقصد للأكل فيها، فلا زكاة في الحصرم والبلح واشتداد الحب.

Waxay sekadu ku waajibaysaa miraha bislaaday kolka ay gaaraan goortii la cuni lahaa, sekana kuma waajibto cinabka aan bislaan iyo timirta ceeriin, iyo bicirta.

ويجب فيها العشر إن لم تسق بمؤنة ونصفه إن سقيت بها، وما زاد على النصاب أخرج منه بقسطه. ولا زكاة فيما دون النصاب إلا أن يتطوع.

Toban dalool ayaa ku waajibaya haddii aan waraabinteeda xoolo ku bixin. Haddii waraabinteeda xoolo ku baxaanna intaa barkeed ayaa ku waajibaya. Wixii nisaabka ka dheeraad ahna qaybtiisa ayaa laga bixinayaa. Wixii nisaab ka yarna seko malaha in qofku iska sadaqaysto mooyee.

- وأما الذهب فنصابه عشرون مثقالا. والفضة مائتا درهم.

- Dahabka nisaabkiisuna waa labaaatan *mithqaal*¹. qalinkana lababoqol oo dirham.

ويجب فيهما ربع العشر وما زاد فبحسابه.

Waxaana labadaba ku waajibaya tobandalookii afar udhiggiis wixii intaa ka badanna waa la xisaabin.

¹ *Mithqaalku: waa beeg hore oo aan hadda la adeegsan, hase ahaatee culumadu waxay ku qiyaaseen nisaabka qalinka 594.124 garaam, dahabka saafiiga ahna 84,875 graam.*

ولابد فيهما من الحول إلا ما حصل من معدن أو ركاز فيخرجها حالا، وفي الركاز الخمس.

Waana in dowgoodu go' haddii aysan ahayn wax uu helay oo ama macdan ah ama kayd ah (ceeriinka) waa in uu islamarkaa baxsho (sekadooda) kaydkana waxaa ku waajib ah shan u dhig.

وأما زكاة التجارة فنصابها نصاب ما اشترت به من النقدين، والنقدان هما الذهب والفضة ولا يعتبر إلا آخر الحول ويجب فيها ربع عشر القيمة. ومال الخليطين أو الخلطاء كمال المنفرد في النصاب والمخرج إذا كملت شروط الخلطة.

Sekada ganacsiga qaybteeduna waa moodkii lagu soo geday inta uu la egyahay, moodkuna waa dahabka iyo qalinka, dowga dhammaadkiisa ka horna go'imayaan, waxaana ku waajibaya afardaloolka tobanudhigga qiimaheedii. Xoolaha wadaagga ahna ama lawadaago waa sidi midka kelida qayb ahaan iyo bixinta haddii shuruudda shirkadu dhammaystiranto.

وزكاة الفطر تجب بإدراك جزء من رمضان وجزء من شوال على كل مسلم عليه وعلى من عليه نفقتهم إذا كانوا مسلمين على كل واحد صاع من غالب قوت البلد إذا فضلت عن دينه وكسوته ومسكنه وقوته وقوت من عليه نفقتهم يوم العيد وليلته.

Sekada Fitraduna waxay ku waajibaysaa haleelidda qayb rabadaan ka mid ah iyo qayb shawwaal ka mid ah, qofkasta oo muslim ah iyo qofkii ay quudintiisu saarantahay waxaa ku waajib ah, haddii ay muslimiin yihiin, midkasta laba sacab oo cuntada magaalada laga cuno tan u badan ah, haddii ay ka soo haraan dayntiisa iyo marashadiisa iyo hoygiisa iyo cuntadiisa iyo cuntada dadka in uu quudsho laga rabo maalinta ciidda ah iyo habeenkeeda.

وتجب النية في جميع أنواع الزكاة مع الإفراز للقدر المخرج.

Waxaana waajib ah in la niyaysto jaadadka sekada oo dhan kolka uu saarayo qaybti la bixin lahaa.

ويجب صرفها إلى مَنْ وُجد في بلد المال من الأصناف الثمانية من:

- 1- الفقراء. 2- والمساكين. 3- والعاملين عليها. 4- والمؤلفة قلوبهم. 5- وفي الرقاب.
- 6- والغارمين وهم المدينون العاجزون عن الوفاء. 7- وفي سبيل الله، وهم الغزاة

المتطوعون وليس معناه كل عمل خيري. 8- وابن السبيل، وهو المسافر الذي ليس معه ما يوصله إلى مقصده. ولا يجوز ولا يجزئ صرفها لغيرهم.

Waxaana waajib ah in la siiyo qofkii jooga isla magaaladaas ee ka mid ah siddeedda jaad ee:

1. Kuwa saboolka ah (fuqarada). 2. Iyo danyarta (masaakiinta). 3. Iyo shaqaalaha sekada soo aruurinaya. 4. Iyo dadka diinta dhawaan soo galay. 5. Iyo addoomaha. 6. Iyo kuwa qaamaysan, waana kuwa daynta lagu leeyahay ee aan iska bixin Karin. 7. Iyo mujaahidiinta, waana dagaalyahannada iskood u soo baxay, lagamana wado fal kasta oo wanaagsan. 8. Iyo socotada, waana musaafirka aanan haysan wax uu ku gaaro halkii uu u socday. Mana bannaana mana gudayo haddii meelo kale lagu baxsho.

الصيام Soonka

يجب صوم شهر رمضان على كل مسلم مكلف ولا يصح من حائضٍ ونفساءٍ ويجب عليهما القضاء ويجوزُ الفطرُ لمسافرٍ سفرَ قصرٍ وإن لم يشقَّ عليه الصومُ، والمريضُ وحاملٌ ومرضعٌ يشقُّ عليهم مشقةٌ لا تحتملُ الفطرُ ويجب عليهم القضاء.

Waxaa ku waajib ah qof kasta oo muslim qaangaara ah soomidda bisha soonqaad, kana ansixi maayo haweeney caado qabta ama umul ah waxaana ku waajib ah labadaa in ay qalleeyaan, waxaana u bannaan in uu afor kii socdaal ah socdaal gaaban haddii uu dano yaanuu soonku ku dhib ahaane.

Waxaa in uu afuro leh qofkii xanuunsan ama uurrayda ama tii nuujinaysay kuwaa oo uu dhibayo soonku dhib aan loo adkaysan Karin, waxaana ku waajib ah in ay qalleeyaan.

ويجب التَّيِّبُ والتَّعِينُ فِي النَّيَّةِ لِكُلِّ يَوْمٍ وَالْإِمْسَاكُ عَنْ:

✓ الجماع.

✓ والاستمناء وهو استخراج المني بنحو اليد.

✓ والاستقاءة.

✓ وعن الردة.

▼ وعن دخول عين جوفاً إلا ريقه الخالص الطاهر من معدنه.

▼ وأن لا يُجنَّ ولو لحظةً.

▼ وأن لا يُغمى عليه كلَّ اليوم.

Waxaana waajib ah in habeennimada la niyaysto, lana magacaabo maalin kasta, lagna reebtoomo:

- ▼ Utegidda haweenka.
- ▼ Iyo booraysiga oo ah in biyaha gacanta la isaga keeno.
- ▼ Iyo ismatajinta.
- ▼ Iyo diinta oo laga baxo¹.
- ▼ Iyo in caloosha wax galaan, inta aan candhuufta nuxurkiisa ah oo kaliya ee daahirka ah ahayn.
- ▼ Waana in aanuu waalan ilbiriqsiha ha ahaadee.
- ▼ Waana in aanuu suuxin maalinta oo dhan.

ولا يصح صوم العيدين وأيام التشريق، وكذا النصف الأخير من شعبان ويوم الشكِّ إلا أن يَصِلَهُ بما قبله أو لقضاء أو نذرٍ أو وردٍ كَمَن اعتاد صوم الإثنين والخميس. ومن أفسد صومَ يوم من رمضانَ ولا رخصةَ له في فطره بجماعٍ فعليه الإثم والقضاء فوراً وكفارة ظهارة.

Mana ansaxayso in la soomo maalmaha labada ciidood iyo maalmaha tashriiqa²,

Sidoo kale, (lama soomo) qaybta dambe ee bisha shacbaan iyo maalinta shakiga³, in uu qofku xiriirsho soon uu horey u wetay mooyaane ama qalle ama nadar (uu ballan qaaday) ama wardi sida qofkii caado ka dhigtay in uu soomo isniinta iyo khamiista.

Qofkii uu ka buro soonka maalin ka mid ah bisha soon ee aan cudurdaar lahayn haweenay uu u tegay awgeed, wuu dambaabay waxaana ku waajib ah in uu qalleeyo soo'ka kafaarada dihaarkana⁴ baxsho.

وهي عتق رقبة فإن لم يستطع فصيام شهرين متتابعين فإن لم يستطع فإطعام ستين مسكينا أي تملك كل واحد منهم مداً من قمحٍ أو غيره مما هو غالب قوت البلد، والمدُّ هو ملء الكفين المعتدلتين.

Waana in qof la xureeyo haddii uusan awoodin, in laba bilood oo isku xigta la soomo, haddii uusan awoodin in uu quudsho lixdan miskiin oo ah in uu siiyo mid kasta oo ka

¹ Diinta oo laga baxo, waxyaalaha soonka burrinaya ayay ka mid tahay.

² Maalmaha tashriiqu waa saddex maalmood oo maalmaha la xajinayo ka mid ah.

³ Waa maalinta shacbaan soddonka yahay.

⁴ Dihaarku waa in ninku naagtiisa ku yiraahdo: "Hooyaday oo kale baad iga tahay", kafaaradiisuna waa saddex walxaato middood: Addoon uu xureeyo, ama laba bilood oo isku xigta oo uu soomo ama lixdan miskiin oo uu quudsho.

mid ah madaal haruur ah ama wax la mid ah ee ah waxa badanaaba dalka laga cuno, madaalkuna waa laba sacab oo dhexdhexaad ah oo buuxa.

Xajka الحج

فصل: يجب الحجُّ والعمرةُ في العمرِ مرَّةً على المسلم الحرِّ المكلفِ المستطيعِ بما يوصله ويردُّه إلى وطنه. فاضلاً عن دينه ومسكنه وكسوته اللائقين به ومؤنةٍ من عليه مؤنته مدَّةَ ذهابه وإيابه.

Cutub: Xajka iyo cimraduna waxay qofka muslimka ah ee xorka ah ee qaangaarka ah ee awooda ku waajibayaan hal mar inta uu noolyahay. Ee ka dheeraad ah dayntiisa iyo degaankiisa iyo highiisa ku habboon iyo dheefta dadka dheeftoodu saarantahay inta uu sii socdo iyo inta uu soo socdo.

وأركان الحج ستة:

الأول: الإحرام وهو أن يقول بقلبه دخلت في عمل الحج أو العمرة.

الثاني: الوقوف بعرفة بين زوال شمس يوم عرفة إلى فجر ليلة العيد.

الثالث: الطواف بالبيت.

الرابع: السعي بين الصفا والمروة سبع مرات من العقد إلى العقد.

الخامس: الحلق أو التقصير.

السادس: الترتيب في معظم الأركان.

Xajka tiirarkiisuna waa lix:

Kan koowaad: waa xirashada, waana in uu laabtiisa ka yiraahdo: waxaan galay howshii xajka ama cumrada.

Kan labaad: waa istaagidda carafa inta u dhaxaysa wereegidda qorraxda harki maalinta carrafa inta laga gaaro waaberiga habeenka ciidda.

Kan saddexaad: waa kacbada oo lagu dawaafo.

Kan afaraad: waa socodka inta safa iyo marwo u dhaxaysa toddoba jeer gees ka gees.

Kan shanaad: waa xiirashada ama jarashada.

Kan lixaad: waa isku xejinta tiirarka badankooda.

وهي إلا الوقوف أركان للعمرة. ولهذه الأركان فروضٌ وشروطٌ لا بدَّ من مراعاتها.

ويشترطُ للطوافِ قطعُ مسافةٍ وهي من الحجرِ الأسودِ إلى الحجرِ الأسودِ سبعَ مراتٍ.

Sidookale, intaan joogsiga ahayn tiirar bay u yihiin cumrada¹, arkaantaasina waxay leedahay waajibaad iyo shuruud ay lagama maarmaan tahay in la dhawro. Waxaana dawaafka shardi u ah in la gooyo fogaan waana laga billaabo dhagaxa madow oo lagu yimaado isla dhagaxa madow toddoba jeer.

ومن شروطه:

§ سترُ العورة

§ والطَّهارةُ

§ وأن يجعلَ الكعبةَ عن يساره لا يستقبلُها ولا يستدبرُها.

وحرَمَ على من أحرم:

- طيبٌ.
- ودهن رأس وحية بزيت أو شحم أو شمع غسل ذائبين.
- وإزالة ظفر وشعر.
- وجماع ومقدماته.
- وعقد النكاح.
- وصيد مأكول بري وحشي.
- وعلى الرجل ستر رأسه ولبسٌ محيطٌ بخياطةٍ أو لبدٍ أو نحوه.
- وعلى المحرمة سترُ وجهها وقفاً.

Shuruuddiisana (dawaafka) waxaa ka mid ah:

§ Dedidda xumaysta (cawrada).

§ Iyo iscalasaynta (dahaarada).

§ Waana in uu kacbada bidixdiisa ka dhigo, kana soo horjeesan kana sii jeesan.

Qofkii xirtana (xajka ama cumrada) waxaa ka xaaraan ah:

- Iscarfinta.
- Iyo in madaxa iyo garka saliid lagu subkado ama jinfi ama miid malab oo dareeraya.
- Iyo cidiyaha iyo timaha jarashooda.
- Iyo isutagga (ragga iyo haweenka), iyo waxyaabaha la xiriira.
- Iyo guursashada.
- Iyo ugaarsiga ugaar duurjoog ah oo la cuno.
- Ninkana waxaa ka reebban in uu madaxiisa dedo iyo in uu gashado dhar wareegsan oo tolan ama buste iwm.

¹ Ujeedadu waa in dhammaan tiirarka la soo sheegay kolka laga reebo joogsiga carrafa ay arkaan u yihiin cumrada.

- Haweenayda xiratayna waxaa ka reebban in ay wajigeeda deddo iyo gacma gashiga.

فمن فعل شيئاً من هذه المحرمات فعليه الإثم والفدية. ويزيد الجماع بالإفساد ووجوب القضاء فوراً وإتمام الفاسد، فمن أفسد حجّه بالجماع يمضي فيه ولا يقطعه ثم يقضي في السنة القابلة.

Qofkii fala wax ka mid ah waxyaabahaas la diiday waxaa korkiisa ahaaday dambi iyo isfurasho¹. Haweenka u tegiddooduna waxay badinaysaa buridda waxaana waajib ah qallayntiisa si degdeg ah. Qofkii xajkiisa ku buriya haweenay uu u tegay wuu dhammaystirayaa mana goynayo kadibna wuxuu qallaynayaa sanadka ku xiga.

ويجب:

- 1- أن يحرم من الميقات، والميقات هو الموضع الذي عينه رسول الله ﷺ لِيُحْرَمَ منه كالأرض التي تسمى ذا الحليفة لأهل المدينة ومن يمر بطريقهم.
- 2- وفي الحج مبيت مزدلفة على قول.
- 3- ومنى على قول، ولا يجبان على قول.
- 4- ورمي جمرة العقبة يوم النحر.
- 5- ورمي الجمرات الثلاث أيام التشريق.
- 6- وطواف الوداع على قول في المذهب.

1. Waxaana waajib ah in uu miiqaadka² ka xirto, miiqaadkuna waa meesha uu magacaabay Nabigii Ilaahay si uu uga xirto sida dhulka loo yaqaan dalxaliifah ee reer Madiino loogu talagalay iyo wixii ayaga ku jid ah.
2. Xajkana waxaa ka mid ah ku nagaashada Musdalifa sida culumada qaar qabaan.
3. Iyo mina sida culumada qaar qabaan, waajibna maaha sida culumada qaar qabaan.
4. Iyo in la tuuro jamrada caqaba maalinta loogidda (naxriga)
5. Iyo tuurista saddexda dhagax maalmaha durraamada (tashriiqa).
6. Iyo dawaafka sagootiska (wadaaca) oo ah aragti culumada mad-habta shaaficiyada qaar qabaan.

¹ Isfurashadu: waa xoolo saddaqa ah oo uu bixinayo oo loo yaqaano "fidyo".

² Miiqaadku waa meelo gaar ah oo xajka iyo cumrada laga xirto oo aanan la ogolayn in la dhaafo xirasho la'aan, dalalkuna way kala miiqaad duwanyihiin, hadba say isku dhinac u yihiin ayay isugu miiqaad yihiin.

وهذه الأمور الستة مَنْ لم يأتِ بها لا يفسدُ حجَّهُ إنما يكون عليه إثمٌ وفديةٌ، بخلاف الأركان التي مرَّ ذكرها فإن الحج لا يحصل بدونها ومَنْ تركها لا يجبره دمٌ أي ذبحُ شاةٍ.

Arrimahaa lixda ah qofkii aan la imaan xajkiisu buri mayo waxaase korkiisa ahaanaya dambi iyo isfurasho (fidyo), mana aha sida arkaanta hore loo soo sheegay, maxaa wacay la'aanteed xajku ansixi mayo qofkii ka tagana kuma kabi karyo waqdhaacin oo ah ri uu gowraco.

ويحرم صيد الحرمين ونبأتهما على محرمٍ وحلالٍ وتزيدُ مكةُ بوجوب الفدية فلا فدية في صيد حرم المدينة وقطع نباتها. وحرّمُ المدينة ما بين جبل عَيْرٍ وجبل ثَوْرٍ.

Waxaana ka reebban in la dilo ugaarta labada xaram ama la gooyo dhirtooda mid xiranaya iyo mid kaleba, makana waxaa u dheeraad ah isfurashada (fidyada), isfurashana malaha ugaarta xaramka madiino iyo goynta dhirteedu. Xaramka madiinana waa inta u dhaxaysa buurta Cayr iyo buurta tawr.

Ganacsiga

المعاملات

فصل: يجب على كلِّ مسلمٍ مكلفٍ أن لا يدخلَ في شيءٍ حتى يعلمَ ما أحلَّ الله تعالى منه وما حرّمَ لأن الله سبحانه تعبّدنا أي كلّفنا بأشياء فلا بُدَّ من مُراعاة ما تعبّدنا.

Cutub: Waxaa qof kasta oo muslim ah oo qaangaar ah ku waajib ah in uusan faragelin waxa inta uu ka ogaanayo waxa Ilaah ka xalaaleeyay waynaayee iyo waxa uu xaaraameeyay, maxaa wacay Eebbe nasahnaayee, wuxuu inooga cibaado doonay oo inoo xilsaaray waxyaabo kolkaa waxaa lagama maarmaan ah in la dhawro waxyaabahaas uu in aan ku caabudno inaga doonay.

وقد أحلَّ البيعَ وحرّمَ الرِّبا، وقد قيّد الشرعُ هذا البيعَ بألة التعريف لأنه لا يحلُّ كلُّ بيعٍ إلا ما استوفى الشروط والأركان فلا بد من مراعاتها.

Hubaalna waxaa ah in Eebbe uu xalaaleeyay ganacsiga oo xaaraameeyay dulsaarka (Ribada), sharciguna wuxuu ku xiray ganacsiga asiga oo qeexay, maxaa wacay ma bannaana ganacsi kasta oo aan fulin shuruudaha iyo tiirarka kolka waa lagama maarmaan in la dhowro.

فعلى من أراد البيع والشراء أن يتعلم ذلك وإلا أكل الربا شاء أم أبى وقد قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: "التاجر الصدوق يُحشر يوم القيامة مع النبيين والصديقين والشهداء".

Kolka qofkii doona ganac ama gadasho waa in uu bartaa arrinkaas haddii kale wuxuu cunayaa dulsaarka (ribada) ama ha doono ama yuusan doonine, Nabigii Ilaahayna nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee wuxuu yiri: "**Ganacsadaha runlowga ah waxaa maalinta qiyaamaha lala soo bixinayaa nabayaasha iyo kuwa runlowyaasha ah iyo shahiidyada**"

وما ذاك إلا لأجل ما يلقاه من مجاهدة نفسه وهوأه وقهرها على إجراء العقود على الطريق الشرعيّ وإلا فلا يخفى ما توعد الله من تعدّي الحدود.

Taasina wax kale maaha ee waa waxa uu la kulmayo ee dhibka ah si uu naftiisa iyo hiyigiisa ugu celsho gelista qandaraasyada ku salaysan sharciga, haddii kale ma qarsoona wixii Ilaah ugu gooddiyay qofkii ka gudba soohdimaha.

ثم إن بقية العقود من الإجارة والقراض والرهن والوكالة والوديعة والعارية والشركة والمساقاة كذلك لا بد من مراعاة شروطها وأركانها.

Intaa kadib, heshiisyada intooda kale sida Ijaarashada, iyo daynta, iyo rahanka iyo wakaalashada iyo ammaanada iyo amaahashada iyo shuraakada iyo sahamyada sidoo kale waxaa lagama maarmaan ah in la dhowro shuruuddooda iyo tiirarkooda.

وعقدُ النكاح يحتاجُ إلى مزيد احتياطٍ وتثبتٍ حذرًا مما يترتب على فقد ذلك وقد أشار القرآن الكريم إلى ذلك بقوله تعالى: ﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قُوا أَنفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا وَقُودُهَا النَّاسُ وَالْحِجَارَةُ﴾ [التحریم:6] قال عطاء رضي الله عنه: "أن تتعلم كيف تصلي وكيف تصوم وكيف تبيع وتشتري وكيف تنكح وكيف تطلق".

Iyo Heshiiska nikaaxa in aad looga feejignaado yuu u baahanyahay iyo kaadsi feejigan waxyaabaha ka imaanaya awgod haddii aan sidaa la yeelin, quraanka kariimka ahna wuu tilmaamay taas Ebbe kor ahaayee wuxuu yiri: ﴿Kuwii rumeeyayow naftiina ka koriya iyo ahalkiina naar shidaalkeedu dadka iyo dhagaxyada yahay﴾ Cadaa' raalli Allaha ka noqdee wuxuu yiri: "waa in aad barato sida aad u tukanayso, iyo sida aad u soomayso, iyo sida aad u iibinayso iyo sida aad u iibsanayso iyo sida aad u guursanayso iyo sida aad u furayso".

فصل: يجرم الربا فعله وأكله وأخذُه وكتابتُه وشهادتُه وهو:

§ بيعُ أحد التّقدين بالآخر نسيئةً والتّقدانِ هُما الذهب والفضة مضروبين سكة أم لا والحليُّ والتّبرُّ.

§ أو بغير تقابض أي افتراق المتبايعين قبل التقابض.

§ أو بجنسه كذلك أي الذهب بالذهب أو الفضة بالفضة نسيئة أو افتراقاً بغير تقابض.

§ أو متفاضلاً أي بيع الذهب بالذهب أو الفضة بالفضة نسيئة أو افتراقاً بغير تقابض.

§ أو متفاضلاً أي بيع الذهب بالذهب أو الفضة بالفضة مع زيادة في أحد الجانبين على الآخر بالوزن.

Cutub: Waxaa xaaraan ah falidda dulsaarka (ribada) iyo cuniddeeda iyo qaadashadeeda iyo markhaatigeeda dulsaarkuna waa:

- § In lagu iibsho labada mood midkood kan kale ayada oo dib loo dhigayo, labada moodna waa dahabka iyo qalinka ama lacag ahaan ha u tunnaadeen ama yaanay ahaane iyo murriyaha iyo dahabka iyo qalinka ceeriin.
- § Ama ayaga oo aan kala qaadan, oo ah in ay kala tagaan labada wax kala gadanaysa ayaga oo aan isku wareejin.
- § Ama wax asiga ku jaad ah, oo ah in dahab lagu iibsho dahab ama qalin lagu iibsho qalin ayada oo dib loo dhigayo ama ay kala tagaan ayaga oo aan isku wareejin.
- § Ama kala wareegsasho la'aan, oo ay kala tagaan labadii ganactamayay ayaga oo aan hantidi kala wareegsan.
- § Ama ay kala badanyihiin oo dahab lagu iibsho dahab ama qalin lagu iibsho qalin ayaga oo dheeraad la socdo labada dhinac midkood.

§ والمطعوماتُ بعضها ببعضٍ كذلك أي لا يحلُّ بيعها مع اختلاف الجنس كالقمح مع الشعير إلا بشرطين: إنتفاء الأجل، والافتراق قبل التقابض ومع اتحاد الجنس كالبر بالبر يشترط هذان الشرطان مع التماثل فلا يحل بيع شعير بشعير إلا مثلاً بمثلٍ كيلاً مع الحلول والتقابض قبل الافتراق.

- § Jidiinkana jaadadkiisu sidaas bay isku yihiin, oo ma bannaana in laysku iibsho ayada oo jaadadkoodu kala duwan yihiin, sida qamadiga iyo haruurka, laba

shardi la'aantood oo ah: in waqtigii dhammaado iyo in la kala tago ayada oo aan hantidi la kala qaadan.

Haddii jaadkuudu mid yahay sida bur la dhaafsaday bur waxaa shardi u ah labadaa qodob waana in ay isu dhigmaan, kolka ma bannaana haruur in haruur lagu iibsho haddii aanay islu dhigmin oo ka mid ahayn culayska iyo waqtiga iyo farasaarka inta aan lakala tegin.

§ ويحرم بيع ما لم يقبضه.

§ واللحم بالحيوان.

§ والدَّيْنِ بِالَّذِينَ كَانُ يَبِيعُ دَيْنًا لَهُ عَلَى زَيْدٍ لِعَمْرٍو بِثَمَنِ مَوْجِلٍ إِلَى شَهْرٍ مَثَلًا.

§ وَيَبِيعُ الْفَضُولِيُّ أَيُّ بَيْعٍ مَا لَيْسَ لَهُ عَلَيْهِ مَلِكٌ وَلَا وِلَايَةٌ.

§ وَمَا لَمْ يَرَهُ وَيَجُوزُ عَلَى قَوْلٍ لِلشَّافِعِيِّ مَعَ الْوَصْفِ.

Waxaan bannaanayn iibinta wax aan laysu gacansaarin, iyo hilib in xoolo lagu iibsho, iyo amaah in amaah lagu iibsho, sida asiga oo ka iibsha camar dayn uu ku leeyahay sayd uguna iibsho qiime dib laga bixin doono bil kadib tusaale ahaan. Iyo iibka ciyaarta ah, oo uu iibinayo wax uusan hanti u lahayn lona wakiilan, iyo wax uusan arkin, waana bannaantahay (in qofku wax uusan arkin iibsho) aragti Shaafici qabo darted, haddii la tilmaamo.

§ وَلَا يَصِحُّ بَيْعُ غَيْرِ الْمَكْلُفِ وَعَلَيْهِ، أَيُّ لَا يَصِحُّ بَيْعُ الْمَجْنُونِ وَالصَّبِيِّ وَيَجُوزُ بَيْعُ

الصَّبِيِّ الْمَمَيَّزِ فِي مَذْهَبِ الْإِمَامِ أَحْمَدَ.

Mana ansaxayo ganacsiga qof aan qaangaar ahayn, sidoo kale ma ansaxayo ganacsiga qof waalan iyo carruurta, waana bannaantahay wax lala ganacsado carruurta garaadsatay sida ay qabto madhabta Imaam Axmad.

§ أَوْ لَا قُدْرَةَ عَلَى تَسْلِيمِهِ.

§ وَمَا لَا مَنفَعَةَ فِيهِ.

§ وَلَا يَصِحُّ عِنْدَ بَعْضِ بَلَا صِغَةَ وَيَكْفِي التَّرَاضِي عِنْدَ آخَرِينَ.

§ وَيَبِيعُ مَا لَا يَدْخُلُ تَحْتَ الْمَلِكِ كَالْحَرِّ وَالْأَرْضِ الْمَوَاتِ.

§ وَيَبِيعُ الْمَجْهُولِ.

§ وَالنَّجْسِ كَالدَّمِ.

§ وَكُلِّ مَسْكِرٍ.

§ Waxaan bannaanayn in uu qofku iibsho wax uusan awood u lahayn in uu baxsho.

- § Iyo wax aan waxdheef lahayn.
- § Mana ansaxayso sida ay culumada qaar qabaan ganacsi aan qaab¹ lahayn, culumada qaarna way banneeyeen haddii la isku raaco.
- § Iyo iibinta wax aan la hanan karin sida kulaylka iyo dhulka cidlada ah.
- § Iyo iibinta wax aan la aqoon.
- § Ama wax nijaas ah sida dhiigga.
- § Iyo dhammaan wixii dadka maandoorinaya.

§ ومحرم كالطنبور وهو ءالة لهُ تشبه العود.

§ ويحرم بيع الشيء الحلال الطاهر على مَنْ تعلمُ أنه يريد أن يعصي به كالعنب لمن يريد للخمر والسلاح لمن يعتدي به الناس.

§ وبيع الأشياء المسكرة.

§ وبيع المعيب بلا إظهارٍ لعيبه.

- § Iyo (iibinta) Wax xaaraan ah sida shareerada oo ah qalab lagu ciyaaro oo u eg kabanka.
- § Waxaa xaaraan ah in laga iibsho wax xalaal ah daahirna ah qofkii aad ogtahay in uu xumaan ku falayo sida cinabka qofkii ka samaynaya khamri iyo hubka qofkii dadka ku xedgudbaya.
- § Iyo iibinta waxyaabaha lagu saqraamo.
- § Iyo iibinta wax xun ayada oo aan la sheegin meesha xumaantiisa.

فائدة: لا تصح قسمة تركة ميتٍ ولا بيع شيءٍ منها ما لم توفَّ ديونه ووصاياه، وتخرج أجرة حجة وعمرة إن كانا عليه، إلا أن يباع شيءٍ لقضاء هذه الأشياء، فالتركة كمرهونٍ بذلك كرقيق جنى ولو بأخذ دانق لا يصح بيعه حتى يؤدي ما برقبته أو يأذن الغريم في بيعه.

F.G: Ma bannaana in qofka dhintay dhaxalkiisa la qaybsho ama qaar ka mid ah la iibsho haddii aan lagudin dayntiisa iyo dardaarankiisa, waxaana laga bixinayaa kharashka xajka iyo cumrada haddii lagu lahaa, haddii aan loo iibin wax kale si loo gudo waxyaabahaas, kolka dhaxalku taa ayuu ku xiranyahay sida addoon dambi gaystay sida asiga oo xaday taanaba ha ahaatee ma bannaana in la iibsho inta uu iska soo gudayo waxa lagu leeyahay ama uu idmo in la iibsho qofkii qaanta lahaa.

ويحرم أن يفتر رغبة المشتري أو البائع بعد استقرار الثمن لبيع عليه أو ليشتره منه، وبعد العقد في مدة الخيار أشدُّ. وأن يشتري الطعام وقت الغلاء والحاجة ليحبسة

¹ Qaab loogu dhawaaqo lahayn, sida "intaas baan kaaga iibshay, kan kalena yiraahdo, waan ku qaatay" iwm.

ويبيعه بأغلى، وأن يزيد في ثمن سلعة ليُغرَّ غيره. وأن يفرق بين الجارية وولدها قبل التمييز، وأن يغشَّ أو يخون في الكيل والوزن والذرع والعدَّ أو يكذب.

Waxaa xaaraan ah in la himadjebiyo qofka wax iibsanaya ama iibinaya kadib markuu sugnaaday qiimihii si uu uga duliibsado ama uga gato, heshiiska kadib inta lagu jiro waxkala gadashadana waa sii darantahay. Iyo (waxaa xaaraan ah) in uu iibsado cuntada kolka sicirbararku dhaco si uu u kaydsho dabadeedna qiime sare ugu iibsho, iyo in uu kor u qaado qiimaha ganacda si uu dadka ugu dhaco. Iyo in uu kala geeyo haweenayda iyo carruurteeda aan garaadsan, iyo in uu dhagro ama khayaano beegga iyo miisaanka iyo dhudhunka iyo tirade ama uu been sheego.

وأن يبيع القطن أو غيره من البضائع ويقرضَ المشتري فوقه دراهم ويزيد في ثمن تلك البضاعة لأجل القرض، وأن يقرض الحائك أو غيره من الأجراء ويستخدمه بأقل من أجره المثل لأجل ذلك القرض أي إن شرط ذلك ويسمون ذلك الربطة.

Iyo in uu iibsho suufka ama wax kale ee ganac ah ee uu daynsho iibsadaha lacag kadibna uu qiimaha ganacdaa kor u qaado daynka uu siiyay awgiis, iyo in uu daynsho yaxarka ama cid kale oo ah xoogsato dabadeedna ku shaqaaleeyo mushaarkii caadiga ahaa in kayar daynkaa uu siiyay dartiis ujeeddadu waa haddii uu sidaa kula gorgortamo waxayna taas ku magacaabaan xarig.

أو يقرض الحراثين إلى وقت الحصاد ثم يبيعون عليه طعامهم بأوضع من السعر قليلاً، ويسمون ذلك المقضيَّ.

Ama uu daynsho beeralayda inta miruhu soo go'ayaan kadibna ay miraha asiga ka iibinayaan in kayar qiimaha ay suuqa ka joogaan, kadibna ay ku magacaabayaan gudasho.

وكذا جملة من معاملات أهل هذا الزمان وأكثرها خارجة عن قانون الشرع. فعلى مريد رضا الله سبحانه وسلامته دينه ودينه أن يتعلم ما يحل وما يجرم من عالم ورع ناصح شفيق على دينه، فإنَّ طلبَ الحلالِ فريضةٌ على كلِّ مسلمٍ.

Waxaa taa la mid ah dhammaan ganacsiga dadka waayahan nool, badankiisuna wuu ka baxsanyahay xeerka sharciga, kolka qofkii doona in uu ka raalli ahaado Ilaah nasahnaayee, diintiisuna u nabadgasho iyo aduunyadiisu waa in uu ka bartaa wixii xalaal ah iyo wixii xaaraan ah caalim dhowrsan oo waaniye u naxaya diintiisa ah. Maxaa wacay xalaasha in la doonaahi waa waajib saran qof kasta oo muslim ah.

فصل: يجب على الموسر نفقة أصوله المعسرين أي الآباء والأمهات الفقراء وإن قدروا على الكسب.

Cutub: Waxaa ku waajib ah qofkii wax haysta in uu dheefsho waalidkiisa aabbayaasha iyo hooyooyinka saboolka ah, haddii ay doonaan ha ahaadeen kuwa awooda in ay xoogsadaane.

ونفقة فروعه أي أولاده وأولاد أولاده إذا أعسروا وعجزوا عن الكسب لصغر أو زمانة أي مرض مانع من الكسب.

Waxaa kale oo ku waajib ah in uu dheefsho wixii dhashiisa ah ee carruurtiisa ah iyo carruurtooda haddii ay saboolaan in ay xoogsadaanna awoodi waayaan carruurnimo awgeed ama jirro xanuun joogtaa ah ee xoogsiga u diiday.

ويجب على الزوج نفقة الزوجة ومهرها، وعليه لها متعة إن طلقها. والمتعة مال يعطى للمطلقة بغير سبب منها.

Ninkana waxaa ku waajib ah quudka haweeneydiisa iyo meherkeeda, waxayna ku leedahay siismo haddii uu furo. Siismaduna waa hanti la siiyo haweeneyda la furay sabab xaggeeda ah la'aanteed.

وعلى مالك العبيد والبهائم نفقتهم وأن لا يكلفهم من العمل مالا يطيقونه ولا يضرهم بغير حق.

Ninkii addooma lehna iyo xoolo waxaa ku waajib ah dheefintooda, iyo in aanuu ku qaadin wax aanay awoodin oo howl ah iyo in uusan ku garaacin xaqdarro.

ويجب على الزوجة طاعته في نفسها إلا في ما لا يحل، وأن لا تصوم النفل ولا تخرج من بيته إلا بإذنه.

Haweeneydana waxaa ku waajib ah in ay ninkeeda adeecdo inta aan ahayn waxyaabaha aan bannaanayn, iyo in aanay soomin sunno gurigana ka bixin idankiisa la'aan.

فصل: من الواجبات القلبية الإيمان بالله وبما جاء عن الله والإيمان برسول الله وبما جاء عن رسول الله. والإخلاص وهو العمل بالطاعة لله وحده. والندم على المعاصي. والتوكل على الله.

Cutub: Waajibaadka qalbiga waxaa ka mid ah in Eebbe la rumeeyo, iyo wixii Eebbe xaggiisa ka yimid, iyo in Nabiga Alle la rumeeyo iyo wixii nabiga Alle xaggiisa ka yimid, iyo laabsamida, oo ah in loo falgalo adeecidda Ilaahay kaligiis, iyo in laga shallaayo xumaanta Allana la tala saarto.

والمراقبة لله. والرضا عن الله بمعنى التسليم له وترك الاعتراض. وتعظيم شعائر الله. والشكر على نعم الله بمعنى عدم استعمالها في معصية.

Iyo in loo dhowrsanaado Eebbe awgiis, iyo in Eebbe raalli loo ahaado, ujeedadu waa in la isu dhiibo lagana fogaado ka soo horjeesadkiisa lana wayneeyo astaamaha diinta Alle, lagana mahad celsho barwaaqada Ilaahay, Ujeedaduna waa in loo adeegsan wax xumaan ah.

والصبر على أداء ما أوجب الله والصبر عما حرم الله تعالى وعلى ما ابتلاك الله به. وبغض الشيطان. وبغض المعاصي. ومحبة الله ومحبة كلامه ورسوله والصحابة والآل والصالحين.

Iyo in loo dulqaato gudashada wixii Eebbe waajibshay, lagana caago wixii Eebbe xaraameeyay kor ahaayee, iyo wixii uu kugu jarribay, iyo shaydaanka oo la naceeyo, macsidana la naco, Eebbana la jeclaado, hadalkiisana la jeclaado iyo nabigiisa iyo asaxaabtiisa iyo qaraabadiisa iyo inta suuban.

فصل ومن معاصي القلب: الرياء بأعمال البر وهو العمل لأجل الناس أي ليمدحوه ويحبط ثوابها والعجب بطاعة الله وهو شهود العبادة صادرة من النفس غائباً عن المنة.

Cutub: Macsida qalbiga waxaa ka mid ah istuska samafalka oo ah in wax loo falo dadka awgood si ay u faanshaan waxaana buraya ajarkeeda, iyo isla waynida addeecid Alle awgeed, oo ah in uu fiirinta cibaadada ay naftu falayso ayada oo illoobayso nicmooyinkii Alle.

والشك في الله والأمن من مكر الله والقنوط من رحمة الله، والتكبر على عباده وهو رد الحق على قائله واستحقار الناس والحقد وهو إضرار العداوة إذا عمل بمقتضاه ولم يكرهه، Iyo Eebbe oo laga shakiyo, iyo ciqaabtiisa oo laga aamin noqdo, iyo naxariistiisa oo laga quusto, iyo addoomihiisa oo la iska wayniisiiyo, kaas oo ah in xaqa qofkii yiraahda lagu diido, iyo dadka oo la liido, iyo urugada oo ah nacayb uurka lagu qaado hadduu ku camal falo nacaybkaas oo uusan nacbaysan.

والحسد وهو كراهية النعمة للمسلم واستثقالها وعمل بمقتضاها والمن بالصدقة ويبتل ثوابها كأن يقول لمن تصدق عليه ألم أعطك كذا يوم كذا وكذا.

Iyo xaasidnimada oo ah in muslimka wanaagga lala necbaado iyo ka lugjiidkeeda iyo in nacaybkaa lagu camal falo, iyo sadaqada oo la sheegto ajirkeeduna wuu burayaa kolkaa, sida asiga oo ku yiraahda qofkii uu wax ku sadaqaystay: miyaanan ku siin maalin heblaayo waxaa iyo waxaa.

والإصرار على الذنب وسوء الظن بالله وعباد الله والتكذيب بالقدر والفرح بالمعصية منه أو من غيره والغدر ولو بكافر كأن يؤمنه ثم يقتله، والمكر، وبغض الصحابة والآل والصالحين والبخل بما أوجب الله والشح والحرص.

Iyo dambiga oo lagu madax adaygo, iyo mala xumada Eebbe iyo addoomaha Eebbe, iyo qadderka oo la beensho, iyo macsida faliddeeda oo lagu farxo, ama asigu ha falo ama cidkale e', iyo dhagrida gaalba ha ahaadee sida in uu magaangelsho dabadeedna dilo, sirta, iyo asaxaabta nabiga oo la naecbaado iyo ahalkiisa iyo dadka wanaagsan, iyo in laga bakhaylo wixii eebbe waajibiyay, iyo gacan adaygga iyo laxjeclida.

والاستهانة بما عظم الله والتصغير لما عظم الله من طاعة أو معصية أو قرآن أو علم أو جنة أو نار.

Iyo in la fududaysto wixii Eebbe wayneeyay, iyo in la liidoo wax uu Eebbe wayneeyay ee ah daacada ama macsida ama quraanka ama cilmiga ama jannada ama naarta.

فصل ومن معاصي البطن:

- أكل الربا والمكس والغصب والسرقعة وكل مأخوذ بمعاملة حرمها الشرع.

- وشرب الخمر وحد شاربها أربعون جلدة للحر ونصفها للرقيق وللإمام الزيادة تعزيراً.

Cutub: Macsida calooshana waxaa ka mid ah in ribada la cuno iyo canshuurta iyo bililiqada iyo xatooyada iyo wax kasta oo lagu qaatay qaab aan sharcigu bannayn, iyo khamrada oo la cabo, iyo in qofkii caba afartan karbaash lagu dhufto haddii uu xor yahay haddii uu addoon yahayna barkeed, imaamkuna wuxuu xaq u leeyahay in uu intaa ka badsho.

- ومنها أكل كل مسكر وكل نجس ومستقدر.
- وأكل مال اليتيم أو الأوقاف على خلاف ما شرط الواقف والمأخوذ بوجه الاستحياء بغير طيب نفس منه.

Waxaa kale oo ka mid ah in la cuno wax kasta oo maanka doorinaya iyo wax kasta oo najaas ah iyo wixii qarmoon iyo cunidda hantida agoonta ama xoolaha waqafka ah oo loo cuno si aan ahayn sidii uu rabay qofkii waqafka baxshay, iyo wixii laga qaatay qof xishoonaya oo aan waxa uu baxshay si fiican naftiisa uga soo go'in.

فصل ومن معاصي العين: النظر إلى النساء الأجنبية بشهوة إلى الوجه والكفين وإلى

غيرهما مطلقاً، وكذا نظرهن إليهم إن كان إلى ما بين السرة والركبة ونظر العورات.

Macsida ishana waxaa ka mid ah in haweenka ajnabiga ah shahwo lagu fiirsho wajigooda iyo gacmahooda, ama iyaga oo dhan la fiirsho, ama ay haweenku eegaan inta xudunta iyo jilbaha (raga) u dhaxaysa iyo fiirinta xumaysta.

ويحرم على الرجل والمرأة كشف السواتين في الخلوة لغير حاجة. وحل مع المحرمة أو الجنسية نظر ما عدا ما بين السرة والركبة إذا كان بغير شهوة. ويحرم النظر بالاستحراق إلى المسلم والنظر في بيت الغير بغير إذنه أو شيء أخفاه كذلك.

Waxaana ka xaaraansan ninka iyo naagtaba in ay faydaan xumaysta baahi la'aan. Waxayna taasi u bannaantahay hadday haweenaydu xigto tahay ama ay isku jinsi yihiin, in laga eego inta aan ahayn xuddunta iyo jilibka inta u dhaxaysa haddii aan shahwo lagu eegayn.

Waxaana xaaraan ah in si liidid ah loo fiirsho qofka muslimka ah iyo in la eego guryaha dadka kale ogolaasho la'aan, ama wax ay qarsaday.

فصل: ومن معاصي اللسان:

- الغيبة وهي ذكرك أخاك المسلم بما يكرهه مما فيه في خلفه.
- والنميمة وهي نقل القول للإفساد.
- والتحرिश من غير نقل قول ولو بين البهائم.
- والكذب وهو الكلام بخلاف الواقع
- واليمين الكاذبة.

Cutub: Macsida carrabkana: waxaa ka mid ah xanta waana ayada oo walaalkaaga muslimka ah lagu sheego wax uu qabo oo uu kahanayo asiga oo aan ogayn, iyo diradiraha oo ah in hadalka dadka look ala qaado si laysugu diro iyo isku caraadinta ayada oo aan hadal look ala qaadin haddii ay danto xoolaba ha ahaateene. Iyo beenta oo ah hadalka aan xaqeeqada ahayn iyo dhaarta beenta ah.

- وألفاظ القذف وهي كثيرة حاصلها كل كلمة تنسب إنسانا أو واحدا من قرابته إلى الزنى فهي قذف لمن نسب إليه إما صريحا مطلقا أو كناية بنية ويجد القاذف الحر ثمانين جلدة والرقيق نصفها.

Iyo erayada qadafka oo ah kuwa badan oo looga jeedo in eray kasta oo ka sheegaya qof ama mid ka mid ah xigtada qofkaas falka dhillaysi (sino) qadaf bay ku tahay qofkii ka sheega ama si cad ha u yiraahdo ama si maldahane si kas ah, waxaana la xadaynayaa qofka qadafka fala ee xorka ah siddeetan karbaash haddii uu addoon yahayna intaa badhkeed.

- ومنها سب الصحابة وشهادة الزور.
- ومطل الغني أي تأخير دفع الدين مع غناه أي مقدرته.
- والشتم واللعن والاستهزاء بالمسلم وكل كلام مؤذ له.
- والكذب على الله وعلى رسوله. والدعوى الباطلة.

Macsida carrabka waxaa ka mid ah asaxaabta nabiga oo la caayo iyo markhaati beenlaha, iyo lugjiidka qofka hodonka ah, oo ah in uu la daaho gudidda daynta asiga oo hodon ah oo awooda, iyo cayda iyo nacaladda iyo ku jeesjeeska muslimka iyo hadal kasta oo dhibaya iyo beenta Eebbe laga sheego iyo nabigiisa iyo ashtakada beenta ah.

والطلاق البدعي وهو ما كان في حال الحيض أو في طهر جامع فيه. والظهار وهو أن يقول لزوجته أنت علي كظهر أمي أي لا أجامعك، وفيه كفارة إن لم يطلق بعده فوراً وهي عتق رقبة مؤمنة سليمة فإن عجز صام شهرين متتابعين، فإن عجز أطعم ستين مسكينا ستين مداً.

Iyo furriinka bidciga ah waana midka dhaca goorta caadada ama daahir ay tahay laakiin uu u tegay, iyo ka dhaarashada oo ah in uu ku yiraahdo adigu hooyaday oo kale baad iga tahay oo looga jeedo dhaqmaad kuusoo doonan maayo, kafaaro ayaana ku waajibaysa haddii uusan isla markiiba furin waana in uu xureeyo qof mu'min ah oo dhamaystiran, haddii uu kariwaayo waa in uu laba bilood oo isku xigta soomo, haddii uu kari waayo waa in uu quudsho lixdan muskiin lixdan sacab.

● ومنها اللحن في القرآن بما يخل بالمعنى، أو الإعراب وإن لم يخل بالمعنى. والسؤال للغني بمال أو حرفة.

● والنذر بقصد حرمان الوارث، وترك الوصية بدين أو عين لا يعلمها غيره.

(Dambiyada carrabka waxaa kale oo ka mid ah) in laxniga quraanka kolka la akhrinayo wax ujeeddada wax u dhimaya ama higaadda inkasta uusan ujeeddada wax u dhimin, iyo tuugsiga qofka hodonka ahi baryo xoolo ama xoog, iyo sharadka (nadarka) ayada oo loola jeedo in qofka dhaxalka iska leh la hungeeyo, iyo ka dardaarmidda dayn ama xoolo aan asiga mooyee qofkale ogayn oo laga tago.

● والانتفاء إلى غير أبيه أو إلى غير مواليه أي من أعتقه كأن يقول: "أنا أعتقني فلان" يسمى غير الذي أعتقه. والخِطبة على خِطبة أخيه. والفتوى بغير علم. وتعليم وتعلم علم مضر لغير سبب شرعي.

Iyo in la sheegto cid aan aabbahaa ahayn ama aan ahayn sheegatadiisa oo ah qofkii xoreeyay, sida asiga oo yiraahda "hebel baa I xoreeyay" asiga oo magacaabaya qof aan ahayn qofkii xoreeyay. Iyo in uu doonto naag ninkale u doonan. Ama in la fatwoodo aqoon la'aan. Ama baridda iyo barashada aqoon wax dhibta dhabbaqa sharci ah la'aanteed.

● والحكم بغير حكم الله. والندب والنياحة.

● وكل قول يحث على محرّم أو يفتر عن واجب.

● وكل كلام يقدر في الدين أو في أحد من الأنبياء أو في العلماء أو القرآن أو في شيء من شعائر الله.

Iyo in wax lagu xukumo wax aan sharciga Eebbe ahayn, iyo baroorta iyo calaacalka¹, iyo eray kasta oo ku boorrinaya xaaraanta ama hakinaya samaynta waajibka, iyo hadal kasta oo diinka duraya, ama mid ka mid ah nabiyada ama culumada ama quraanka ama wax ka mid ah cibaadooyinka Eebbe.

ومنها التزمير. والسكوت عن الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر بغير عذر. وكنتم العلم الواجب مع وجود الطالب. والضحك لخروج الريح أو على مسلم استحقاراً له.

Waxaa kale oo ka mid ah yeerinta turumbada, iyo ka aamusidda wanaagga fariddiisa ama xumaanta reebiddeeda dhabbaqa la'aan, iyo qarinta aqoonta lagama maarmaanka ah ayada oo loo baahanyahay, iyo ku qoslidda haddii qof dhuuso ama ku qoslidda qof muslim ah liidid awgeed.

وكنتم الشهادة. وترك رد السلام الواجب عليك. وتحريم القبلة للحاج والمعتمر بشهوة. ولصائم فرضاً إن حشي الإنزال وقيل يكره، وتحريم القبلة لمن لا تحل قبلته.

Iyo markhaatiga oo la qarsho, ama salaanta kugu waajibka ah celinteeda laga tago, waxaa xaaraan ah in shahwo loo dhunkado xaajiga ama kan cimraysanaya. Ama mid sooman soon farad ah haddii uu ka cabsado in biyo ka yimaadaan waxaa kale oo la yiri waa karaahiyo, waxaana xaaraan ah dhunkashada qof aan dhunkashadiisu bannaanayn.

فصل: ومن معاصي الأذن الاستماع إلى كلام قوم أخفوه عنه، وإلى المزمار والطنبور وهو عالة تشبه العود، وسائر الأصوات المحرمة. وكالاستماع إلى الغيبة والنميمة ونحوهما، بخلاف ما إذا دخل عليه السماع قهراً وكرهه ولزمه الإنكار إن قدر.

Cutub: Macsida dhegtana: waxaa ka mid ah in la dhagaysto hadal dad ka qarsanaya, ama turunbada iyo shareerada oo ah qalab u eg giitaarka (kabanka) iyo dhammaan codadka xaaraanta ah, waxaana la mid ah dhagaysiga xanta iyo diradiraha iwm, waxaanna sidaa ahayn haddii codku u soo gaaro si awooddiisa ka baxsan uuna necbaysto uuna diido haddii uu awoodo.

فصل: ومن معاصي اليدين: التطفيف في الكيل والوزن والذرع، والسرقة ويحدُّ إن سرق ما يساوي ربع دينارٍ من حرزه بقطع يده اليمنى ثم إن عاد فرجله اليسرى ثم يده اليسرى ثم رجله اليمنى.

Cutub: Macsida gacmahana: waxaa ka mid ah dhimidda beegga iyo miisaanka iyo dhudhunka, iyo xatooyada waana laga goynayaa haddii uu ka xado wax la eg diinaar

¹ Baroortu: waa erayada uu qofku ku baroorto kolka laga dhinto, sida asiga oo yiraahda "hoogayeeey, ba'ayeeey, asigoo kale ma jirin, mana jiri doono iwm. Calaacalkuna: waa ooyinta iyo qaylada qofka laga dhintay ku ooyo kolka uu arko aaska qofka ama maydkiisa iwm.

afar udhiggiis xaydaankiisii ayada oo la gooyo gacantiisa midig kadib haddii uu u laabtana lugtiisa bidix kadib haddii uu u laabtana gacantiisa bidix kadib haddii uu u laabtana lugtiisa midig.

- ومنها النهب والغصب والمكس والغلول.
- والقتل وفيه الكفارة مطلقا وهي عتق رقبة مؤمنة سليمة فإن عجز صام شهرين متتابعين، وفي عمدته القصاص إلا إن عفا عنه الوارث على الدية أو مجانا.
- وفي الخطأ وشبهه الدية وهي مائة من الإبل في الذكر الحر المسلم ونصفها في الأنثى الحرة المسلمة. وتختلف صفات الدية بحسب القتل.
- ومنها الضرب بغير حق، وأخذ الرشوة وإعطائها.
- وإحراق الحيوان إلا إذا ءاذى وتعين طريقا في الدفع، والمثلة فبالحيوان. واللعب بالنرد وكل ما فيه قمار حتى لعب الصبيان بالجوز والكعاب، واللعب بآلات اللهو المحرمة كالطنبور والرّباب والمزمار والأوتار.
- ولمس الأجنبية عمدا بغير حائل، أو به بشهوة ولو مع جنس أو محرمة.
- Waxaa kale oo ka mid ah (macaasida gacmaha) boobka iyo xoogga iyo canshuurta iyo xatooyada¹.
- Iyo dilka wuxuuna leeyahay kaffaaro guud ahaan oo ah xorayn qof mu'min ah oo dhamaystiran, hadduu kari waayana waa in uu soomo laba bilood oo isku xigta, midka loo kasayna waa qisaas haddii uusan cafin qofkii dhaxalka lahaa oo diyo qaato ama diyo la'aan cafiyo.
- Dilka gafka ah iyo wixii la mid ahna waa diyo oo ah boqol geel ah ninka xorka ah ee muslimka ah, intaa barkeedna la bixinayo haddii ay gabadh xor ah oo muslim ah tahay, diyaduna waxay noqonaysaa hadba sida dilku yahay.
- Waxaa kale oo ka mid ah dilka xaqdarrada ah, iyo qaadashada laaluushka iyo bixintiisa.
- Iyo gubidda xawayaanka in uu dhibaato gaysto oo aan qaabkale oo laysaga reebo la helin mooyaane. Iyo deldelidda xayawaanka. Iyo ciyaarta nardiga² iyo wax kasta oo khamaar ku jiro haddii ay doonto ha ahaato gariirta iyo qoraytuurka ay carruurta ku ciyaartee. Iyo ku ciyaarista qalabka madadaalada ee xaaraanta ah sida durbaanka iyo turumbada iyo shareerada
- Iyo taabashada haweenay aan xigto³ ahayn ded la'aan, ama uu xigsi ku taabtay kacsii awgiis haddii uu dano jinsigiisa ha ahaado ama xigtadiisa¹.

¹ Xatooyada xoolaha gaalada dagaalka looga furto inta aan la qaybin.

² Waa ciyaar lagu ciyaaro dhagax afar dhinac leh oo dhinac kasta ay ku taallo tiro dhibco ah, kolkaas baa qofku ku dultuurayaa miis ay dushiisa ku masawiranyihiin diilimo iyo qaabab la ogyahay, qofkastana dhagaxyo yaryar oo sidi lacagta loo qoray ayuu haystaa oo miiska u saran, kolka uu dhagaxa afargeeska ah tuuro ayuu tiradi u soo baxda ku gurayaa oo dhaqaajinayaa dhagaxiisa miiska saran.

³ Xigtadu waa midda sharcigu oggolyahay ee ma aha midda qabiilka.

وتصوير ذي روح، ومنع الزكاة أو بعضها بعد الوجوب والتمكن، وإخراج ما لا يجزئ أو إعطاؤها من لا يستحقها، ومنع الأجير أجرته، ومنع المضطر ما يسده، وعدم إنقاذ غريق من غير عذر فيهما، وكتابة ما يحرم النطق به، والخيانة وهي ضد النصيحة فتشمل الأفعال والأقوال والأحوال.

Iyo in la masawiro wax naf leh, iyo in la diido sekada ama qaar ka mid ah kadib kolkii ay waajibtay una suurtagashay, ama bixinta wax aan gudayn (sekada) ama siinta qof aan mudnayn, iyo in loo diido shaqaalaha kiradiisa, iyo in loo diido qof wixii uusan ka maarmayn, iyo in aan la badbaadin qof biyo ku dhacay cudurdaar la'aan, iyo in la qoro wax aanay bannaanayn in lagu dhawaaqo, iyo khiyaanada oo ah kazoo horjeedka waanada waxayna koobaysaa falalka iyo oraahda iyo arrimaha.

فصل: ومن معاصي الفرج الزنى وهو إدخال الحشفة في القبل، واللواط وهو إدخال الحشفة في الدبر، ويجد الحر المحصن ذكرا أو أنثى بالرحم بالحجارة المعتدلة حتى يموت وغيره بمائة جلدة وتعريب سنة للحر وينصف ذلك للرقيق.

Cutub: Macsida ferjigana: waxaa ka mid ah dhillaysiga oo ah in la gelsho dhalfada laanka, iyo qaniisnimada oo ah in la gelsho dhalfada futada, waana laga goynayaa qofka xorka ah ee guursaday nin ama ha ahaado amanaage' ayada oo lagu tuurayo dhagax dhexdhexaad ah inta uu ka dhinto, dadka kalena boqol karbaash baa lagu dhufan sanadna waa la dhoofin qofka xorka ah kuwa addoonta ahna intaa barkeed bay leeyihiin.

ومنها إتيان البهائم ولو ملكه، والاستمناء بيد غير الحليلة الزوجة، وأتمته التي تحل له مثلها، والوطء في الحيض أو النفاس أو بعد انقطاعهما وقبل الغسل أو بعد الغسل بلا نية من المغتسلة أو مع فقد شرط من شروطه.

Waxaa kale oo ka mid ah xoolaha oo la saarto haddii uu doono ha lahaadee, iyo gacan ku booraysiga haddii aysan ahayn tan naagtiisa iyo addoontiisa, iyo in haweenka oo loot ago caadada dhexdeeda ama ugubka ama kolka dhiiggu ka go'o loo tago inta aanay qabaysan ama qabayska kadib ayada oo aan niyaysan midda qabaysatay ama qabayska shruuddiisa qaar ka mid ahi maqanyihiin.

¹ xigsi: waa waxa korka lagu dedo ee kaa xiga waxa kale, marka waxaan bannaanayn in haweenayda aan xigtada sharcigu banneeyay ahayn korkeeda la taabto xigsi la'aan sidoo kale qof kugu jinsi ah sida laba nin ama laba naagood ama qof korkeeda wax kaa xigaan in kacsii awgiis loo taabto ayaduna ma bannaana.

والتكشُّف عند من يحرم نظره إليه أو في الخلوة لغير غرض، واستقبال القبلة أو استدبارها ببولٍ أو غائطٍ من غير حائلٍ، والحائل ما يكون أمامه من شيء مرتفع قدر ثلثي ذراع فأكثر، أو كان وجد الحائل ولكن بعد عنه أكثر من ثلاثة أذرع، أو كان أقل من ثلثي ذراع إلا في المعد لذلك أي إلا إذا كان المكان مهياً لقضاء الحاجة كالمرحاض فإنه يجوز استقبال القبلة واستدبارها فيه.

Iyo isqaawinta qof in uu eego aanay bannaanayn aktiisa, ama isku qaawinta meel qarsoon dan la'aan, ama qiblada oo lagula jeesto ama lagala jeesto kaadi ama ilaaq xigsi la'aan, xigsiguna waa waxa hortiiisa ah ee wax jog leh ah dhudhun laba saddex u dhiggiis in la eg, iyo wixii ka badan, ama xigsi haysta kase fogaaday in ka badan saddex dhudhun, ama uu ka yaraa dhudhun laba seddex u dhiggiis, haddii aysan ahayn meeshu meel loogu tala galay ilaaqda gudashadeeda sida musqulaha kolkaa way bannaantahay in qiblada loo jeesto ama laga sii jeesto.

والتغوط على القبر، والبول في المسجد ولو في إناء، وعلى المعظم، وترك الختان للبالغ ويجوز عند مالك.

Iyo in qabri lagu dul xaaro, iyo masjidka oo lagu kaadsho haddii uu dano weel dhexdiis ha ahaadee, iyo midka mudnaanta leh korkiisa, iyo guditaanka oo uu ka tago qofka qaangaarka ahi, maalikiyaduna way banneeyeen.

فصل: ومن معاصي الرجل: المشي في معصية كالمشي في سعاية بمسلم أي للإضرار به عند الحاكم أو نحوه أو في قتله أي المشي لقتل مسلم أو للإضرار به بغير حق. وإباق العبد والزوجة ومن عليه حق عمّا يلزمه من قصاص أو دين أو نفقة أو بر والديه أو تربية الأطفال.

Cutub: Macsida lugta waxaa ka mid ah: in loo saanqaado fal macsi ah sida in loo baxo diradiro muslim si dhibaato loo gaarsiiyo ayada oo xaakimka lagu dacwaynayo iwm, ama dilkiisa oo ah in loo baxo si loo dilo muslim ama loo dhibaateeyo xaqdarro awgeed, iyo addoonka oo dhuunta ama haweenayda, iyo qofkii xaq ku caddaaday lagu leeyahay, sida qisaasta ama daynta ama quudinta ama daryeel waalid ah ama korinta carruurta ah.

والتبختر في المشي، وتخطي الرقاب إلا لفرجة، والمرور بين يدي المصلي إذا كملت شروط السترة. ومد الرجل إلى المصحف إذا كان غير مرتفع. وكل مشي إلى محرّم وتخلف عن واجب.

Iyo socodka oo lagu faqleeyo, iyo dadka oo laga tillaabsado in ay meel bannaan ahaato mooyee, iyo qofka tukanaya oo la hormaro haddii shuruudda xigsigu¹ dhammaystiranto, iyo in lugta lagu taago musxafka haddii uusan kor u qaadnayn, iyo socod kasta oo loo socdo wax xaaraan ah ama laga dib dhaco wax waajib ah.

فصل: ومن معاصي البدن: عقوق الوالدين. والفرار من الزحف وهو أن يفرَّ من بين المقاتلين في سبيل الله بعد حضور موضع المعركة. وقطيعة الرحم. وإيذاء الجار ولو كافراً له أمان أذى ظاهراً. وخضب الشعر بالسواد وأجازته بعض الأئمة إذا لم يكن يؤدي إلى الغش والتلبس.

Cutub: Macsida jirkana waxaa ka mid ah: waalidka oo lagu caasiyo, iyo dagaalka oo laga cararo kaas oo ah in qofku cararo asiga oo ku jira dagaalyahanka jihaadaya kadib kolkii uu yimid goobtii dagaalka, iyo qaraabada oo la gooyo, iyo deriska oo la dhibo haddii uu doono gaal ha ahaadee la magan gelshay dhibaato muuqata, iyo timaha oo la madoobaysto, culumada qaarna way banneeyeen haddii uusan ahayn mid keenaya dhagar iyo hoosaasin.

وتشبه الرجال بالنساء وعكسه أي بما هو خاص بأحد الجنسين في الملبس وغيره. وإسبال الثوب للخيلاء أي إنزاله عن الكعب للفخر، والحناء في اليدين والرجلين للرجل بلا حاجة.

Iyo nimanka oo isu ekaysiia naagaha iyo geddiskiisa, oo looga jeedo waxa gaarka u ah labada jinsi midkood ee huga iwm ah, iyo dharka oo istustus loo dheeraysto, oo ah in laga hoos mariyo qoobka faan dartiis, iyo gacmaha iyo lugaha oo ninku cillaansado baahi la'aan.

وقطع الفرض بلا عذر. وقطع نفل الحج والعمرة. ومحاكاة المؤمن استهزاء به. والتجسس على عورات الناس. والوشم. وهجر المسلم فوق ثلاث إلا لعذر شرعي.

Iyo waajibka oo laga tago cudurdaar la'aan, iyo sunnada xajka iyo cumrada oo la gooyo, iyo mu'minka oo la dhaajiyo jeesjees dartiis, iyo jaajuusidda cawdara dadka, iyo kuntullaysiga, iyo muslimka oo la gooyo saddex maalmood ka badan haddaan cudurdaar sharci ah loo haysan.

¹ Shuruudda xigsigu, waa shuruudda waxa uu qofka tukanaya dhigaya hortiisa ee iska xejinayo dadka hotiisa maraya, waana in ay haato mid ka ujirta 3 dhudhun, dhudhun laba saddex u dhigiisna joogga la ekaato.

ومجالسة المبتدع أو الفاسق للإيناس له على فسقه. ولبس الذهب والفضة والحريير أو ما أكثره وزنا منه للرجل البالغ إلا خاتم الفضة، والخلوة بالأجنبية بحيث لا يراها ثالث يستحي منه من ذكر أو أنثى.

Iyo in lala fariisto qofka bidciga ah, ama faasiqa ah ayada oo lagu wehlinayo fisqigiisa, iyo dahabka oo la gashado iyo qalinka iyo xariirta ama wax badanka culayskoodu yihiin waxyaabaha, waxayna ka reebanyihiin nimanka qaangaarka ah waxaan ahayn fargashiga qalinka ah, iyo qol la gelidda (khalwada) haweeney shisheeye ah, meel aan qof saddexaad oo laga xishoonayo ka arkayn rag ha ahaado ama dumare.

وسفر المرأة بغير نحو محرم. واستخدام الحرِّ كرهاً. ومعاداة الولي. والإعانة على المعصية. وترويح الزائف. واستعمال أوابي الذهب والفضة واتخاذها. وترك الفرض أو فعله مع ترك ركن أو شرط أو مع فعل مبطل له.

Iyo socdaalka haweenayda sokeeye la'aan, iyo dirqis ku adeegsiga qof xor ah, iyo nacaybka awliyada, iyo macsida oo laysigu kaalmeeyo, iyo beenta oo la buunbuunsho, iyo qalabka dahabka iyo qalinka h oo la adeegsado lana samaysto, iyo waajibka oo laga tago ama la falo ayada oo tiir ama shardi ama fal uu la'aantiis burayo laga tegayo.

وترك الجمعة مع وجوبها عليه وإن صلى الظهر، وترك نحو أهل قرية الجماعات في المكتوبات. ورمي الصيد بالثقل المذفف أي بالشئ الذي يقتل بثقله كالحجر. واتخاذ الحيوان غرضاً. وعدم ملازمة المعتدة للمسكن بغير عذر، وترك الإحداد على الزوج.

Iyo jumcada oo laga tago ayada oo ku waajibtay haddii uu doono duhurkaba ha tukadee, iyo beel tuulo deggan haddii ay ka tagaan jamaacada shanta salaadood, iyo ugaarta oo lagu tuuro wax culus oo ku dilaya culayskiisa sida dhagaxa, iyo in xayawaanka laga dhigto kabdhood¹, iyo tii cudda tirsanaysay oo aan aqalkeeda ku nagaan cudurdaar la'aan, iyo isuqurxinta ninka oo laga tago.

¹ Kabdhoodku: waa kab calaf ah ama qoray iwm oo inta meel la suro lagu gantaal barto ama lagu nishaab barto, marka lama ogola in xawayaan nool inta meel lagu xiro ama la joojiyo lagu kabdhoodo oo lagu gantaal ama nishaabtamo.

وتنجيس المسجد وتقديره ولو بطاهر. والتهاون بالحج بعد الاستطاعة إلى أن يموت، والاستدانة لمن لا يرجو وفاء لدينه من جهة ظاهرة، ولم يعلم دائنه بذلك، وعدم إنظار المعسر. وبذل المال في معصية.

Iyo masjidka oo la najaaseeyo ama la wasakheeyo wax daahir ahba ha ahaadeene, iyo xajka oo la sahlado kadib markii uu karay inta uu ka dhinto, iyo daymashada qofkii aan filayn in uu isga soo gudi doono wax uu ogyahay, qofka wax daynshayna uusan sidaa ogayn, iyo qofka aan daynta bixi karin oo aan la sugin, iyo xoolaha oo lagu baxsho xumaan falidda.

والاستهانة بالمصحف وبكل علم شرعي، وتمكين الصبي المميز منه. وتغيير منار الأرض أي تغيير الحد الفاصل بين ملكه وملك غيره، والتصرف في الشارع بما لا يجوز.

Iyo Musxafka oo la fududaysto iyo cilmi kasta oo sharci ah, ama carruurta yar oo loo gacangelsho, iyo dhulka sumadihiisa oo la bedelo, oo la bedelo soohdimaha u dhaxeeya hantidiisa iyo hantida dadka kale, iyo waddada dhexdeeda oo lagu falo wax aan bannaanayn.

واستعمال المعارف في غير المأذون له فيه أو زاد على المدة المأذون له فيها، أو أعاره لغيره. وتنجير المباح كالمرعى، والاحتطاب من الموات والملح من معدنه والتقدين وغيرهما، أي أن يستبد بهذه الأشياء ويمنع الناس من رعي مواشيهم والماء للشرب من المستخلف وهو الذي إذا أخذ منه شيء يخلفه غيره.

Iyo adeegsiga wax la soo ammaahday loo adeegsado wax aanan loo oggolaan ama uu ku dheeray goortii intii loo ogolaaday, ama uu qof kale sii ammaahshay, iyo seeraynta wixi bannaan sida daaqa, ama ka xaabaysiga dhulka bannaan iyo ka cusbaysigiisa iyo qodashada dahabka iyo qalinkiiisa, ujeedadu waa in uu duudsado waxyaabaha oo uu dadka u daaqa xoolahooda iyo biyaha la cabayo oo ka mid ah isdabayaalka waana waxyaabaha haddii wax laga qaato ay wax kale meeshiisi soo gelayaan.

واستعمال اللقطة قبل التعريف بشروطه. والجلوس مع مشاهدة المنكر إذا لم يعذر. والتطفل في الولائم وهو الدخول بغير إذن أو أدخلوه حياء. وعدم التسوية بين الزوجات في النفقة والمبيت. وأما التفضيل في المحبة القلبية والميل فليس بمعصية.

Iyo baadida oo la adeegsado ayada oo aan loo yaboohin sidii xeerkeedu ahaa, iyo in la fariisto oo la daawado xumaanta cudurdaar la'aan, iyo walimooyinka oo lagu dhacdhaco oo ah in la aado martiqaad la aan ama ay xishood dartiis ugu yeeraan, iyo xaasaska oo aan laga simin xagga dheefta iyo hoyaadka wixii dhinaca jacaylka laabta ku xiran iyo u janjeersigu macsi ma aha.

وخروج المرأة إن كانت تمر على الرجال الأجانب بقصد التعرض لهم. والسحر.
والخروج عن طاعة الإمام كالذين خرجوا على علي فقاتلوه.

Iyo bixitaanka haweenayda haddii ay tahay mid maraysa meel rag shisheeye ah joogaan si ay ugu babacdhigto, iyo sixirka, iyo ammarka imaamka oo laga baxo, sidii kuwii ka baxay (imaam) Cali ee la dagaalay.

قال البيهقي: كل من قاتل عليا فهم بغاة وكذلك قال الشافعي قبله، ولو كان فيهم من هم من خيار الصحابة لأن الولي لا يستحيل عليه الذنب ولو كان من الكبائر.

Bayhaqi wuxuu yiri: dhammaan kuwii la dagaalay Cali waxay ahaayeen kuwa gardaran, sidaa oo kalena waxaa yiri Shaafici asiga ka hor, inkasta oo ay ku jiraan qaar ka mid ah asaxaabta waxgaradkoodi, maxaa yeelay waligu dambi kama dowsana kabaa'irtaba ha ka mid ahaadee.

والتولي على يتيم أو مسجد أو لقضاء أو نحو ذلك مع علمه بالعجز عن القيام بتلك الوظيفة. وإيواء الظالم ومنعه ممن يريد أخذ الحق منه. وترويع المسلمين.

Iyo in la qabto maamulka agoon iyo masaajid iyo maxkamad iwm asiga oo og in uusan ka soo bixi karin howshaas, iyo dulmilowga oo la magan gelsho iyo in laga reebo qofkii doonaya in uu xaqa ka qaato iyo cabsiinta muslimiinta.

وقطع الطريق ويحد بحسب جنايته إما بتعزير أو بقطع يد ورجل من خلاف إن لم يقتل أو بقتل وصلب أي إن قتل. ومنها عدم الوفاء بالندر، والوصال في الصوم وهو أن يصوم يومين فأكثر بلا تناول مفطر. وأخذ مجلس غيره أو زحمته المؤذية أو أخذ نوبته.

Iyo jidgoyska waana laga gudayaa hadba sida dhiciisu yahay ama ganaax ama gacan iyo lug isdhaaf ah goyn haddii uusan wax dilin ama dil iyo deldelid haddii uu wax dilo, waxaa ka mid ah ballanqaadka oon la oofin, iyo soonka oo la xiriirsho waana sidi asiga oo sooma laba maalmood iyo in ka badan asiga oo aan afurin. Iyo in uu qaato fadhi uu qofkale lahaa ama uu ciriirsho oo dhibo, ama uu qaato kaalintiisa.

التوبة: تجب التوبة من الذنوب فوراً على كل مكلف وهي الندم والإقلاع والعزم على أن لا يعود إليها وإن كان الذنب تركاً فرض قضاؤه أو تبعة لآدمي قضاؤه أو استرضائه.

Towbada: Waxaa ku waajib ah qof kasta oo qaangaar ah in uu ka dowbad keeno dambiyada, waana shallaytada iyo ka reebbanaanta iyo ku adkaysiga in uusan mar kale u laaban, haddii daqmbigu ahaa waajib uu ka tegayna wuu soo gudayaa ama uu ahaa wax qof leeyahay wuu u gudayaa ama cafis waydiisanayaa.

إنتهى ما قدر الله جمعه مختصر عبد الله الهرري الكافل بعلم الدين الضروري، سبحان ربك
رب العزة عما يصفون وسلام على المرسلين والحمد لله رب العالمين.

Way dhammaadeen wixii Ilaah inoo qadderay in aan qorno, ee ah mukhtasarkii
Cabdullaahi al-Harari ee ku filnaa cilmiga diiniga ah ee lama huraanka ah, Eebbaa
nasahnaaday, Eebbihii mudnaanta lahaa, kana nasahnaa waxay sheegayaan,
nabadgelyana ahaatay nabiyaasha dushooda, mahadna Ilaah baa leh, Eebbihii uunka.